AKADEMIYADU WAXAY TIFAFTIRTAA BUUGAAGTA

Shanta tiir ee hawlaha Akademiyada loo igmaday ee gundhigga looga dhigay waxaa kamid ah;

- *In ay mas'uul ka noqoto cilmibaarisyada dalka laga sameynayo.*
- *In ay horumariso afka soomaaliga,*
- *In ay dhawrto hiddaha iyo dhaqanka ay ummadu leedahay.*
- *In ay qorto buugaag, kuwa la qorayna ay tifaftirto*
- *Iyo in ay ilaaliso oo ay diiwaan geliso meelaha taariikhiga ah ee dalka.*

Haddaba, Akademiyadu bishan Disember iyo bishii ka horreysay ee Nofember waxa ay la talisay qorayaal da'yar oo gaaraya ilaa 15 qore. Waxa ay tifaftirtay oo ay akhrisay ilaa 7 buug oo qorayaal dhalinyaro ah ay qoreen. Si buug kasta loo hufo oo Afsoomaali sax ah loogu soo saaro Akademiyadu waxa ay u dhistay guddi u xilsaaran akhrinta, tifaftirka, sixidda iyo talabixinta buugaagta la qoray ee aan weli la daabicin. Haddii buugga horey loo daabacay ee uu qoruhu doonayo in uu dib u soo saaro; Akademiyadu waxay diyaar u tahay in ay dib u eegto buuggaas. Ogow buug soo maray tifaftirka Akademiyada Cilmiga Fanka iyo Suugaanta wuu ka meelmarsan yahay buug bannaanka ama meel kale laga soo saaray. Waayo Akademiyada hadafkeeda ayaa ka mid ah in ay ka warhayso wax kasta oo la qorayo iyo waxkasta oo ummadda loo bandhigayo. Akademiyadu buug kasta marka ay tifaftireyso waxa ay ka eegtaa arrimahan soo socda:

- *Cinwaaanka iyo buuggu ma is leeyihiin*
- *Dhumucda qoraalku buug ma noqon karaa*
- *Farta uu ku qoranyahay ma tahay mid ku habboon*
- *Ereyada, weeraha iyo radidda si sax ah ma isugu xiran yihiin*
- *Naxwe ahaan wadarka iyo kelida iyo magac-uyaallada si sax ah ma loo adeegsaday*
- *Xarfaha labanlaabma iyo ereyada lammaan meelihi ku haboonaa ma loo adeegsaday*
- *Buuggu duluc iyo ujeeddo wax gudbineysa oo laga faa'iideysanayo ma xambaaarsan yahay*
- *Waxyaabaha dhaqanxumada ah ee aan afka iyo Anshaxa ku fiicneyn, ma ka faaf reeban yahay.*

Guddoomiyaha Akademiyada
C/qaadir Nuur Xuseen (Maax)

Dhambaalka Akademiyada oo la daalacanayo

Tusmada Dhambaalka

Dhacdooyinka dunida ---------- 3
Fanka iyo suugaanta ---------- 4
Hiddaha iyo Dhaqanka ---------- 5
Murti iyo Sheekooyin ---------- 6
Ilbaxnimada Islaamka ---------- 7
Dhallinyarada iyo Mustaqbalka ---------- 8
Aragtida Indheergaradka ---------- 9
Sooyaalka Soomaalida ---------- 10
Kobcinta Afka iyo Naxwaha ---------- 11
Arrimaha Haweenka iyo Carruurta ---------- 12
Raadraaca Cilmiga iyo Aqoonta ---------- 13
Ilaalinta Deegaanka iyo Fayadhowrka ---------- 14
Arrimaha Dhaqandhaqaalaha ---------- 15
Xiriirka Waddanka iyo waddaniga ---------- 16
Dhibaatooyinka Abaaraha ---------- 17
Ahmiyadda Akhriska iyo xuquuqda Qoraaga -- 18

OGEYSIIS IYO XAYEYSIIS

"BIL-KHAYR" WAXOABADKA AKADEMIYADA

Waxaa jira hal-ku-dheg Soomaalida caado u ah oo markaasba ay afka ku boobaan. Hal-ku-dheggaasoo ah ***"BIL-KHAYR"*** wuxuu macnihiisu yahay ku faraxsanaanta bisha bilatay inay habeynnadeeda soo socda ka dhigi doonto Caddo looga raysto Cawadarantii ama Gudcurkii dhammaaday ee halista badnaa!.

Waxaa jira macne kale oo la xiriira bisha dhalatay oo loo adeegsado **"BIL-KHAYR!".** Macnahaas labaadna waa in laga fisho inay bishu noqoto beryosamaad loo aayo, Loogana bedbaado abaar, cudur, colaad & belaayo oo dhan.

Intaas kuma eka. Waxaa kale oo hal-ku-dhegga ***BIL-KHAYR*** Soomaalidu ay u adeegsataa wax kasta oo lagu farxo oo shinsi weyn leh marka warkiisu uu u soo yeero ama bidhaantiisu ay soo muuqato!.

Haddaba sidaas si la mid ah ayay ii ahayd bishaaro aan ***"BIL-KHAYR"*** iri markaan hubsaday dib-u-hawl-billaabidda ***Akademiyada Cilmiga, Fanka & Suugaanta ee Soomaaliya!.***.

Muhiimadaha ay ummadda Soomaaliyeed u leedahay xilligan dib-u-soo hinqashada ***Akademiyada*** runtii waa kuwo aad u waaweyn. Waxaana ka mid ah.

- Waa yididdiilo cusub oo u abuurantay ka soo kabashada hoos u dhacyadii ku yimid afka & dhaqanka Soomaaliga dhawr & Labaatankii sano ee la soo dhaafay.
- Maaddaama inta wali ka sii nool xeel-dheerayaashii afka & dhaqanka Soomaaliga ay ku kala maqanyihiin dalka gudihiisa iyo dibaddiisa, ***Akademiyada*** waxay u noqonaysaa bar-tilmaameed ay ku soo hirtaan qalinyahannada & abwaannada Sommaliyeed. Kuwaasoo is haleeliddoodu ay hiil badan u noqonayso afka & dhaqanka Soomaaliga.
- Hab qorista cilmiyaysan ee ***Akademiyada,*** oo uu ka mid yahay ***Wargeyskan Dhambaal,*** wuxuu halbeeg ay ku jaangoostaan u noqon kartaa wax qorayaasha dhallinyarada ah ee Soomaaliyeed ee ku hawllan ama jecel inay wax qoraan. Balse intooda badan xirfaddooda qoraalku ay hoosayso.

Sannad & dhawr bilood uun ka dib markii dib loo hawlgaliyay ayaan maalin dhaweyd soo booqday xarunta ***Akademiyada.*** Waxaan iri ***"BIL-KHAYR!"*** ka dib markaan ogaaday hawlaha waaweyn ee ku saabsan cilmi-baarista & horumarinta afka & dhaqanka Soomaaligaa ee ay halkaas dardarta uga wadaan Guddiga sare ee ***Akadeemiyada.***

Runtii waxqabadka toolmoon ee ay billawday ***Akadeemiyada*** waa guul uu ku faani karo waddani kasta oo Soomaaliyeed oo jecel inuu afka hooyo & dhaqankeennu inay heer sare gaaraan. Soo saarista **Wargeygayska billaha ah ee Dhambaal,** oo ka soo baxa isla ***Akadeemiyada,*** ayaa waxaan oran karaa isagana **"BIL-KHAYR!".**

Ugu dambayntii, aan iraahdo mar kale ***"BIL-KHAYR!" waxqabadka soo-jiidashada leh ee ay billawday Akadeemiyada Cilmiga, Fanka & Suugaanta ee Soomaaliya.***

CALIDEEQ MAX'ED XAASHI



DHAQAN SAWIRAN

Boggan waxa aanu bil walba ku soo qaadan doonaa hal shey oo ah waxyaaba soomaalidu hiddo iyo dhaqan u leedahay, kaas oo adeegsigiisa waayadan dambe laga sii baxayo, waxaanna sheygaa ka bixin doonaa faallo kooban oo ku saabsan waxa laga sameeyo iyo sida loo adeegsado.

Halkan hoose waxaa kaaga muuqda sawirka Aqal ay soomaalida miyiga aad u isticmaasho kaas oo gobolada soomaaliya oo dhan caan ka ah.

AQAL: iyada oo loo eegayo degaanada kala duwan ee soomaalida gaar ahaan dadka reer miyiga ah; aqalku magaca guud waa isaga mid oo waxaa loo yaqaan 'aqal, dug, ama aqal soomaali', laakiin wuxuu ku kala duwan yahay habka loo dhiso iyo waxyaabaha uu ka kooban yahay.

Tusaale waxaan u soo qaadanaynaa habka ugu caansan ee aqalka loo dhiso.

Aqalka reer guuraaga waa Aqal fudud oo marka la guurayo Awr lagu rari karo wuxuuna ka kooban yahay gogol, gurgur, dhigo, udbo iyo xarko. Aqalka meeldhaxaadka ah waxaa lagu dhisi karaa 23 dhigood, 11 qabax iyo 12 lool, Waxayna kala yihiin udub dhexaad, udub horaad, dhig dhexe, dhig dambeed, dhig horaad, dhig feereed, suug iyo lool.

.

GUDDIGA AKADEMIYADA

DHACDOOYINKA DUNIDA

Qaar ka mid ah waddammada adduunka ugu dadka badan

Sannad waliba waxaa sii kordhaya tirada dadyoowga caalamka ee ku nool daafaha caalamka, iyadoo sannadkii 2012ka la xaqiijiyay in dunida caalamka ay ku nool yihiin tiro ahaan dad gaaraya 7 bilyan.

Haddaba waxa aynu eegi doonnaa qaar kamid ah waddammada adduunka ee ugu dadka badan.

1: Shiinaha (China)

Dalka Shiinaha oo ku yaal qaaradda Aasiya ayaa la xaqiijiyey in ay ku nool yihiin dad tiradoodu gaarayso 1,347,350,000 (Hal bilyan, saddex boqol afartan iyo todobo milyan saddex boqol iyo konton kun) oo qof.

Shiinaha inkastoo uu yahay waddanka adduunka ugu dadka badan, haddana xooggaasi waxa uu uga faa'ideystey soo saarista ilo dhaqaale oo waddankaasi uu haatan ku noqdey waddan dhaqaalihiisu si xawli ah u korayo, iyadoo xoogga dadka Shiinaha looga faa'ideystey soo saarista malaayiin wax soo saarka warshadaha oo ka dhigay in adduunka qiimo jaban lagu soo galiyo waxyaabaha Shiinaha lagu farsameeyo.

2: Hindiya (India)



Hindiya oo xuduud la leh dalka Shiinaha kuna yaal Qaaradda Aasiya waa dalka labaad ee dunida ugu dadka badan waxaana la caddeeyey in tirada dadka ku nool dalkaasi uu gaarayo 1,210,193,422 (Hal bilyan, laba boqol iyo toban milyan, boqol sagaashan iyo saddex kun afar boqol laba iyo labaatan kun) oo qof.

Tobankii sano ee ugu dambeeyey dawladda Hindiya iyo qalabka warbaahinta waxay ku jireen olole ballaaran oo dadka waddankaasi loogu wacyigalinayo xakameynta dhalmada, iyadoo dadka loogu yaboohayey abaalmarin haddii ay ku dhaqaaqaan arrimaha la xiriira qorsheynta qoyska.

Hindiya oo ay ku nool yihiin dadka tiradaasi la'eg, waxaa jira malaayiin qof oo nolashoodu aad u liidato, iyadoo ay ka hooseyso nolashoodu heerka faqiirnimada.

Inkastoo dhibaatadaasi ka taagan tahay Hindiya waxaa haddana hareer socota waddankaasi in uu isku dayayo sidii uu saameyn lahaa horumar dhanka dhaqaalaha oo lagu maareeyo nolasha malaayiinta qof ee dalkaasi ku dhaqan ee ay haysato nolol xumada & dhibaatooyinka caafimaadka.

3:Mareykanka (United States of America)

Mareykanka ayaa la tilmaamaa inuu yahay waddanka saddexaad ee ugu dadka badan inkasta oo uu ku faano inuu xoogga dadkiisa uu ugu faa'ideestay abuuridda iyo kobcinta dhaqaalaha dalkaasi.

Haddaba dadka ku dhaqan Mareykanka waxay tiradoodu haatan mareysaa 314,540,000 (Saddex boqol afar iyo toban milyan, shan boqol iyo afar kun) oo qof, inkastoo kororka dadka Mareykanku kor u kacay sannadihii ugu dambeeyey.

4: (Indonesia)

Indonesia oo ah waddan ka kooban 17,508 (Todoba iyo toban kun shan boqol iyo sidded) oo Jasiiradood, Jasiiraddaasi 6 kun oo kamid ah ayaa la deggan yahay, waa waddanka afaraad ee ay ku nool yihiin dadka adduunka ugu tirada badan.

Tirakoob la sameeyay ayaa lagu ogaaday in tirada dadka ku nool Indonesia ay gaarayso 237,641,326 (Laba boqol soddon iyo toddobo milyan, lix boqol afartan iyo kow kun saddex boqol labaatan iyo lix) qof.

.5:Brazil

Brazil oo ah waddan ku yaal Laatin America (Ameerikada Koonfureed) waa waddanka Shanaad ee ay ku nool yihiin dadka aduunka ugu faraha badan.

Waxaana ku nool dalka Brazil dad tiradoodu gaarayso 193,946,886 (Boqol sagaashan iyo saddex milyan, sagaal boqol, afartan iyo lix kun sidded boqol sideetan iyo lix) qof.

6:Pakistan

Dalka Pakistan oo ah dal Muslim ah oo xuduud la leh waddanka Hindiya waxaa ku nool dad tiradoodu gaarayso 180,882,000 (Boqol & sideetan milyan, siddeed boqol siddeetan iyo laba kun) oo qof

W/Q: Cabdulqaadir Sheikh Cabdullaahi (Duceysane)

FANKA IYO SUUGAANTA

Qeybtii 3-aad

Innaga oo maanka ku hayna wixii horey looga yiri suugaan; waa inaan wax ka niraahnaa jaangooyada guud ee noocyada kala geddisan ee suugaanta. Waa maxay suugaantu? Jawaabta su'aashaasi waxaa ka taagnaa muran iyo dood muddo dheer dhex tiil qorayaasha iyo suugaanyahannada ilaa qarniyaal badan. Qoraa walba ama gabyaa walba wuxuu madadaaliye ka ahaa qarnigiisa, qarni walbana si u gooni ah ayuu suugaanta u macnayn jiray. Marka innagoo wax ku qaybsanayna macnaha uu qarnigeennu suugaanta u hayo, waxaa lagu qeexaa inay tahay farshaxannimo qoraal oo soo bandhigaysa nooc waaya-aragnimo oo kuu sawiraya nolosha markaa jidha ama mid la soo dhaafay. Waa qoraaga soo ifbixintiisa waayo-aragnimo run ah ama mid la maleeyey. Haddii si kale loo yiraahdo, suugaantu waa dhigaalka ama kaydka xiisaha faneed ee bani'aadamka, kaasoo wax ka sheegaya rajooyinkooda, riyooyinkooda, dhibaatooyinkooda, horumarkooda, dibudhacooda iyo wixii la mid ah.

Akhriska suugaanta faa'iidooyin badan baynu ka dheefnaa.Waa marka hore e, waa madadaalo dareenkeenna sabaalisa. Waa marka labaad e, waxaynu xal uga hellaa dhibaatooyinka ina soo food saara oo laga yaabo inay haystaan dadka aynu buggaas suugaaneed kula kulmayno oo ku saabsan yahay. Waxay suugaantu ina ilowsiin kartaa ama ina ka sii jeedin kartaa fakar mushkilado inaku furraa. Waxay suugaantu ina bartaa dad qalaad, dalal, dhaqammo, caadooyin iyo degaammo kuweenna ka geddisan oo laga yaabo inay akhristaha xiiso geliyaan. Xiisaha suugaaneed waa mid waqtiga isla baddala, waxaa laga yaabaa in xiisaha markaan riwaayadaha loo qabo ay qarni dabadii isbaddesho.

Tiraabtu waa afka caadiga ah oo hadaleed ama qoraal, kaasoo ka xor ah miisaanka ama ridmada (Rhythm) iyo codboqorka (Alliteration) ay maansadu ku caan baxday.Tiraabtu waxay leedahay hannaan iyo dhismo qoraal.Dhismaha qoraalku wuxuu jaangooyaa ama habeeyaa kala hormarinta fikradaha iyo aaraa'da dulucda qoraalkaas. Haddaan dhanka kale ka eegno, maansada oo siyaabo kala duwan loo qeexo, waxaa laysku raacsan yahay inay leedahay tilmaamo sugan ee gaar ah oo kala ah: Fikrad, sawirasho, dareenkac, miisaan iyo coddheer oo maansadeenna Soomaaliyeed ku caan baxday.

Akhristuhu wuxuu maansada ku raaxaystaa ama uu dhadhansadaa markay dareemayaashiisu u digtoon yihiin inay gabyaaga dareenkiisa wax la qaybsadaan, dulucda fikradda, tixdana fahmaan. Haddii si kale loo yiraahdo, waa inuu akhristuhu dhuuxaa dulucda fikradda u udubdhexaadka ah; waa inuu arkaa sawirka ama humaagga uu gabyaagu sawirtay markuu tixdaas curinayey, waa inuu dareemaa shucuurta iyo qamandacada abwaanka tixdaas; waa inuu cabbiraa miisaanka iyo isudheellitirka allanayaasha iyo meerisyada tixdaas. Si aad loogu darso tilmaamaha kala qoqobay labadaas qaybood ee suugaameed, waxaa loo baahan yahay in si cilmi ah aad looga baaraandego loona kala dhigdhigo.

HEERARKA TIRAABTA

Noocyo dhawr ah oo kale ayaa ku abtirsaday dhanka tiraabta suugaaneed. Nooc walba wuxuu leeyahay dhismo gaar ah oo ka sooca kuwa kale ooy isku bahda yihiin.Farqiga ugu weyn oo kala saara jaadadka tiraabeed waxaa keena dhererka dhitada (Contents), nooca dhacdada, fagaaraha, dulucda, jilayaasha iwm. Curinta tiraabtu wey ka sahlan tahay tan maansada waayo wey ka madax bannaan tahay dabarrada ku xiran maansada sida miisaanka iyo codboqorka.. Tiraabta suugaameed waxaa loo kala qeybiyaa, riwaayado, mala-awaal iyo jiraal. Mala-awaalka waxaa hoos yimaada noofalka, roomansiga, sheekada gaaban, sheeko-baraleyda (Fairy-tales).Jiraalka waxaa isna hoos yimaada maqaalka, taariikhda, qofka hadalka iyo sheekooyinka safarka. Waxaan halkaan ku kala saaraynaa noocyadaas tiraabta suugaameed ah:

NOOFALKA: Waa nooc tiraabeed oo mala-awaal, lehna dherer boqol bog ka kaca ilaa intuu gaaro. Noofalku wuxuu sheeko ahaan ku soo bandhigaa waayo aragnimo ku salaysan nolosha jidha ama nooc kasta oo habnololeed ah. Noofalku wuxuu ahaa nooca ugu caansanaa qorallada tiraabta suugaameed wayo badan, waxaadse mooddaa in waayadaan dambe sheekada gaaban laga doorbiday. Wuxuu noofalku sheekadiisa ina ku dareensiiyaa afcaal, dhacdooyin, dad, meelo iyo xaalado kala duwan si uu kuugu sawiro habnololeed bulsho ama jiraal kale oo dabiici ah. Qisooyinka noofalku waa mala-awaal suurogal ah oo ka afcelinaya habnololeedkaas bulsho iyo waaya-aragnimadeeda.

ROOMANSI: Waa nooc tiraabeed oo dherer ahaan noofalka u dhiganta, soona bandhigta mala-awaal saadaal ah (Romantic Fiction) Waxay dulucda qisadeedu ku salaysan tahay waayo-aragnimo saadaal ama tuhun ah oo aan aadanuhu soo marin. Buugga la yiraahdo: Dagaalkii Labaad ee Aduunmaha" ee uu dhawaan qoray ninka Maraykanka ah ee loogu yeero "George H. Smith" ayaa tusaale wacan u ah noocaan tiraabeed Qoraagaasu wuxuu qoraalkiisa ku soo bandhigayaa waayo-aragnimo tuhun ah ee ay saadaaliyeen culumo xiddigisyahanno ah. wuxuu buuggaasi ku saabsan yahay dagaal ay aduunkeenna iyo meeraha (Planet) Afaraad ee bahocadceedeedka loo yaqaan "Maris" quruun ku dhaqani ay isaga hor yimaadeen.

SHEEKADA GAABAN: Waa jaad tiraabeed oo mala-awaal ah oo ilaa boqol bog dherer ah gaadha. Sheekada gaabani way ka sahlan tahay noofalka xagga dhismaha.Dhererka iyo dhismaha ka sokow, sheekada gaabani waxay noofalka uga geddisan tahay iyadoo ka hadasha hal mardhac (One main incident), jilayaasheeduna ay ka kooban yihiin kuwo noocyada kale ooy isku bahda yihiin.

QOFKAHADAL (BIOGRAPHY): waa jaad tiraabeed oo ka da' weyn noocyada kale ee tiraabta. Waxaa qur'aanka ka buuxa qofkahadallo anbiyadii ku saabsan, waxayse tiraabta noocan ahi si fiican uga bilaabatay carriga ingiriiska qarnigii 17aad. Qofkahadalka oo aalaaba jiraal (nonfiction) ahi, wuxuu ka hadlaa nolol qofeed wuxuuna culayska saaraa tilmaamihii ugu xiiso badnaa qofkaas uu ka hadlayo noloshiisa iyo sidii qofkaasi uga samato baxay dhadhaabbadii socodkiisa nololeed ka hor yimid, hadiiba ay jireen, waxaa qofkahadalka hoos yimaada nooc kale oo tiraabeed ooy isku abtirsadaan oo iskahadal loo yaqaano (Autobiography), kaasoo uu qofku isaga hadlayo taariikhdiisa.

TAARIIKH: Waa tiraab jiraal ah oo qeexaysa xaqaa'iqa dhacdooyin la soo dhaafay. Dhan kale haddaan ka eegno, taariikhdu waa xog kayd ah oo ka hartay waxqabadkii iyo falcelintii aadanaha.

SOCDAAL: Waa nooc sugaaneed oo isna qoraallada tiraabta lagu tiriyo, soojireena ah. Tiraabta noocaan ahi waxay wax ka qortaa safarro, sahammo, dalxiisyo, ama socdaallo ay dad sameeyeen iyo waxay kala kulmeen. Jiraalkaan tiraabeed wuxuu sawiraa dalal, dad, dhaqammo, degaammo, cimilooyin, caadooyin ka fog kana geddisan kuwa akhristaha.

RIWAAYAD: Iyana waa jaad tiraabeed oo aan jiraal iyo male-awaal midna ka marnayn, dulucda sheekadeedana ku soo bandhigta hadal goosgoos ah oo dhexmara jilayaasheeda. Waxay kaga duwan tahay noocyada kale ee tiraabeed iyadoo aan lahayn faallooyin dhaadheer oo uu qoraagu toos u tebinayo.Jilayaasha riwaayadda ayaa dulucdii sheekada codkooda iyo afcaashooda ku soo gudbinaya.

MAQAAL: Waa jiraal suugaaneed oo faallo aan dheerayn ka qora bulshada, dhaqankeeda, nolosheeda iyo wixii la xiriira. Maqaalka waxaa loo kala qaybiyaa mid dadban (Personal) iyo mid baahsan (Impersonal).

Maqaalka bayrsani wuxuu ka afceliyaa aragtida iyo fikradaha uu qoraagiisu ka qabo wax uu ku hawlan yahay oo uu wax ka qorayo. Qoraalka maqaalka bayrsan wuxuu qoraagu u cuskadaa sida uu isagu u arko ama wuxuu isagu qof ahaan ka qabo xaaladdaas bulsho oo uu wax ka qorayo. Maqaalka baahsani si guud oo ka baxsan aragtida gaar oo qof ahaaneed, ayuu uga hadlaa mowduuciisa. Jaadadkaas tiraabeed oo dhami waxay leeyihiin habab qoraal oo kala geddisan. Qayb walba waxay leedahay dhismo iyo sharciyo u gaara oo ka soocaya kuwa kale. Farshaxannimo qoraal oo kala duwan ayaa loo kala adeegsadaa.

C. C. Warsame (Feegaar)

HIDDAHA IYO DHAQANKA

SIDA LOOGA TEGAY DHAQANKII SOOMAALIDA

Inta aanan ka hadlin dhaqanguurka oo ah mowduuca aan u jeedno waxaan ka hormarinayaa faallo gaaban oo guud mar ah iyo dhaqanka iyo dabeecadaha dhulka ummaduhu ku noolyihiin.

Faallo gaaban

Ummad kasta oo dunida ku nool waxa ay leedahay dhaqan u gaar ah ama dhaqammo u gaar ah oo aas aas u ah qeybaha ay ka koobanto jiritaankeeda, nolosheeda iyo baahideeda. Dhaqanku waxa uu la dhashay bini'aadamka, dhaqanka iyo bini aadamku waa laba shey oo isku laran misna aan kala ahaan Karin, sidaas darteed ma jirto ummad aan laheyn dhaqan lagu yaqaanno oo iyada u gaar ah, sidoo kale ma jiri karo dhaqan kali ah oo aan laheyn ummad ku dhaqanta oo lagu yaqaano iyada, ummuduhuna waxa ay ku dhisaan horuumarkooda dhaqanka ay leeyihiin iyagu, haddiiuu kala go'o dhaqanka ummadda iyo horumarkeedu ma dhismi karo horumarkeedu maxaa yeelay waxaa maqan lugihi uu ku istaagi lahaa horumarka.

Dhaqanka waxa uu u kala baxaa laba qeybood oo kala ah: dhaqan wanaagsan iyo dhaqan xun, Waxaana lagu kala gartaa dhaqanka wanaagsan waxa uu waafaqsanyahay diinta islaamka iyo caqliga toosan oo saxda ah. Dhaqanka xunna waxa uu ka hor yimaadaa ama uu khilaafsan yahay diinta islaamka iyo caqliga toosan, taasi waxaa caddeynaya Nebi Muxamad SCW markuu illaahey soo diray waxa uu u yimid carabta oo heysata dhaqan ka kooban mid wanaagsan iyo mid xun waxa uuna ka baabi'iyay dhaqankii xumaa waxa uuna u daayay dhaqankii wanaagsanaa.

Dhaqanka iyo dabeecadaha dhulka

Dal kasta dhulkiisu waxa uu leeyahay dabeecad ugaar ah.

Sidaas darteed dalkeena oo ka kooban Bad iyo Birri oo labaduba ay buuxaan oo ay dihin yihiin waxa uu leeyahay dabeecado dal yeesho tan ugu wanaagsan, sida hawada dhex dhexaadka ah, wabiyadu ay biyuhu qulqulayaan, xeebaha dhaadheer ee ku wareegsan dalka oo dhan, xoolaha nool oo la dhaqdo oo xad dhaafka ah iyo ugaarta faraha badan oo kala jaadka ah ama kala duwan, dhulkeennu waxa uu u qeybsanyahay: dhulka ay daaqaan xoolaha iyo dhul beereed, Dhulkeena oo aad u balaaran gobol kasta oo ka mid ah gobolada dalka waxa uu ku haboonyahay in xoolo lagu dhaqdo iyo in wax lagu beertaba, waxaa kaloo dhulkeennu leeyahya buuro dhaadheer oo ku wanaagsan dalxiiska, dhulkeennu ma aha dhul saxaro oo lama dagaan ah, mana aha dhul uu baraf ka da'o oo lagu rafaado qabowgiisa, waxaas oo dhan waxaa dheer waxaa ilaahey ku manneystay miraha la cuno oo dabiiciga ah oo aanan la tira koobi karin magacyadooda waxaana ka mid ah: Mareerka, Dhafaruurka, Miracaska, Hohobka, Yicibta, Goosayga, Qoonaha, Ontorta, Aneexada, Garuunjada, Miraha Dheenka, Miraha Garaska, Buruqda Cilayga iyo kuwo kale oo farabadan, waana wax lagu noolaan karo oo qofku haddii uu cuno iskaaga noolaan karo kaligood haddii ay dantu ku qasabto iyo haddii kalaba.

Dabeecada uu u sameysan yahay dhulkeena iyo barwaaqadiisa waxay keentay in dadkeenu dhaqankiisu noqdo mid aanan firfircooneyn ama dadkii noqdo dad aanan aad u fakireynin, maxaa yeelay waxay keenaan mushkiladuha iyo dhibaatooyinku in dadku fikiraan, fikirka kaddibna ay helaan xal ama farsamo ay ku daaweeyaan mushkiladii iyo dhibkii ay la kulmeen, marka umadda Soomaaliyeed ee ku dhaqneyd dalka waxay noqdeen dad aanan fikirin ama aanan fikrad keenin isla markaasna aanan hal abuur keeneynin sababtoo ah waxaa ku batay nolosha sahalka ah, waxaana ku yaraaday in ay la kulmaan dhibaatooyin badan oo xaga nolosha ah, waxaas aan ka hadleyno waa wixii hadda ka horeeyay, maxaa yeelay hadda dadkii wuxuu noqday rer magaal, wuxuu ka baxay reer guuraanimadii waxayna la kulmeen mushkilooyin badan oo ayasan aqoon jirin oo ay keentay reer magaalnimadu isla markaasna waxaa dhalatay dowlad taasoo noqotay wax ku cusub oo aad moodo in ay la qabsan aqoon la' yihiin

Hadaba muxuu yahay dhaqan guurka ku dhacay dadka?

Dadka wuxuu lahaa dhaqan dhaqaale u gaar ah oo aad moodo in ay ku gaareen heer isku filnaasho waxaana ugu waaweynaa: sida loo tabcado beeraha, sida loo tarmiyo xoolaha, sida leyskugu daaweeyo daawo dhaqameedka.

Tusaale ahaan haddiiaan soo qaadano tacabkii beeraha iyo wax soo saarkii ay taqaanay umaddaan wuxuu ahaa mid sameeyay horuumar, waxaana ugu waaweynaa waxyaabihii wax lagu tabci jiray: farsamadii loo yaqaanay ***Goobka***, oo lagu goobin jiray tacabka beeraha waxayna ahayd in inta loo yeero dhalinyarada ayagoo ah boqolaal qof ah ay hal maalin geed qaadaan beerta oo ay qardeeyaan, haddana ay halmaalin abuuraan, haddana ay hal maalin falaan, haddana ay hal maalin gooyaan, wixii intaa ka danbeeyana badarkaas waa la xanaaneyn jiray, wixii la cunaayo maahine inta kale waa la bakaari jiray oo godad ayaa lagu shubi jiray, awoodaasi waxay ka faaiido badneyd makiinadaha maanta beeraha lagu fasho.

Haddaba maanta waxaa dhacday dhaqanguur waxaana laga tagay wax alaale iyo wixii dhaqan dhaqaale ahaa, waana laga guuray oo cidina ma rabto, dhaqanguurkiina wuxuu keenay in dalkii laga guuro oo dadkii oo dhan niyadda ku wada haayaan in ay dibadda aadaan, maadaama dhaqandhaqaalihii mar hore laga guuray.

Waxay umaddu lahaan jirtay xeerdhaqameed, kaas oo ku saabsan sidey u gar naqsan jirtay ama arimaheeda garsoor u maamuli jirtay, waxaana uga hadli doonaa qeybta danbe.

W/D Axmed Shiikh Cali Axmed (Buraale)

MURTI IYO SHEEKOOYIN

BOQORADII DHULKII UDUGGA



Maalin maalmaha ka mid ah ayaa boqorkii Faraaciintu wuxuu dhulkii uduga u diray dooni uu hogaaminayey Amiirkii Aswaan (gobol ka mid ah gobolada Masar). Nasiib darro, doontii waxaa haleelay dabaylo iyo mowjado halis ah, taasoo keentay in doontii ayaa ka badbaadey dadkii doonta saarnaa, wuxuuna ku soo noqday dalkiisii isagoo faro maran. Waxaa ku adkaaday inuu Fircoon u sheego jabka qabsaday oo wuu cabsaday maaddaaama aanu fircoon ahayn ninkii dani ku qasabtay inuu u tago boqor Fircoon una xog warramo isagoo diyaar u ah wax walba iney ku dhacaan. Sidan ayuuna ninkii ugu sheekeeyay Fircoon:

"Boqor Fircoon waxaan ku safrayey Doon weyn oo dhererkeedu ahaa 60 mitir ballaceeduna ahaa 20 mitir. Waxaa saarnaa 120 Badmaax oo Faraaciin ah una dhiiran sida dadka madowga ah, howshoodana u gudanayay si daacadnimo ah. Nasiib darro, waxaa dhex nagu haleelay dabeylo xoog leh, oo mowjadihii hadda kor u qaadey saddex mitir. Badweyntii ayaa si aan naxariis lahayn u kacday oo kalliftey in doontii iyo dadkii saarnaaba ay halaagmaan aniga mooyee. Waxaan soo qabsaday loox yar oo doonta ka jabay kaasoo aan kusoo dabbaashey ilaa aan jasiirad cidla ah ka imid, halkaasoo aan muddo saddex maalmood ah kaligey ku noolaa.

"Gaajo ayaan u adkeysan waayey sidaa awgeedna waxaa ku dhex wareegay jasiiraddii cidlada ahayd anigoo cunto raadinaaya. Waxaa intaas soo raaca kalluun iyo shimbiro fara badan. Cuntadii ayaan ka dhergay, dabadeedna dab shitay oo ilaahyada saddaqo u bixiyay."

"Markey sheeko halkaas mareyso ayaan maqlay cod aad iyo aad u dheer, dabadeedna waxaa gilgishay dhulkii oo dhan. Geesaha ayaan fiiriyay laakin wax aan biyo iyo geedo ahayn waan arki waayey. Anigoo yaabban ayaa waxaa hortayda ka soo baxay naag aad iyo aad u weyn oo dhererkeedu gaaraayo labaatan mitir, xaadeeduna gaareyso hal mitir, jirkeedana dahab la moodayo. Naxdin ayaa wadnihii afka I yimid. markay ila hadashay oo I weydiisay sababta aan jasiiradda u imid. Baqdin awgeed ayaan u jawaabi waayay. Waxey iigu dhaaratay iney jirkeyga gubi doonto haddaanan u jawaabin! Anigoo weli aamusan ayey ilkaheeda si tartiib ah iigu qaaday oo baqdin la gariiraya ayaan u sheegay sheekadeydii iyo wixii qabsadey doonteydii iyo dadkeygii."

"Si tartiib ayey ii dejisay oo iigu ballan qaadey inaan si nabad ah waddankeygii ugu noqon doono, inta ka horeysana aan u fasaxanahay inaan jasiirada si nabad ah ugu noolaado cuntadeedana u cuno. Waxay ii sheegtay inaan jasiirada joogi doono muddo afar bilood ah, kadibna aan raaci doono doomo ay Faraaciinu leeyihiin oo halkaas soo mari doona afrtaas bilood kadib. Waxay ii sheegtay in dadka doomahaas wataahi ay I aqoonsan doonaan oo wadankaygi si nabad ah iigu celin doonaan oo dadkaygi iyo caruurtaydiiba arki doono oo waddankaygii aan ku dhiman doono layguna duugi doono. Waxaa kaloo ay iiga sheekeysay taariikhdeedii. Waxay ii sheegtay in iyada iyo dadkeedii oo todobaatan iyo shan qofood ay si farxad leh jasiiradda ugu noolaan jireen muddo aad u dheer ilaa ay uga timid gabar insi ah. Waxay ii sheegtay in ay gabadhaasi ka dambaysey halaaggii ku habsaday dadkeedii oo ciribtirey wixii jasiiradda ku noolaa oo dhan iyada mooyee. Iyaduna kaligeed ayey ilaa iyo maalintaas si murugo leh ugu nooleyd jasiiraddaas."

"Markey arrintaas ii sheegtay ayaan u mahadnaqay una ballan qaadey inaan sheekadeeda u werin doona Boqorka Faraaciinta, anigoo weliba xusi doona sida karaamada iyo deeqsinimada leh ee ay ii soo dhoweysay. Waxaa kaloo aan u ballan qaaday in doon walba oo Faraaciintu leeyihiin oo sida foox iyo beeyo ay iyada soo mari doonto oo ay xoogaa foox ah siin doonaan. Wey igu qososhay. Maarkaan weydiiyay sababta ay iigu qososhayna waxay iigu jawaabtey iney iyadu tahay Boqoraddii Dhulkii Udugga! Waxay ii ballan qaadayiney iyado isiin doonto foox iyo beeyo haddaba intaan doono sababtoo ah dhulkeeda ayaa hodon ku ah. Waxey ii sheegtay in markaan tago jasiiraddu isu bedeli doonto biyo oo ay badda ka mid noqon doonto."

"Markii ay ii dhammaatay muddadii aan joogi lahaa jasiiradda, ayaa waxaa meel fog iiga muuqatay dooni soo socota. Geed ayaan fuulay si aan u hubiyo cidda Doonta leh, waxaana aan xaqiiqsaday iney tahay Doontu doon ka mid ah doomihii Faraaciinta. Waa orday oo si deg-deg ah naagtii ugu sheegay in doon ka mid ah doomihii Faraaciinta soo socoto. Intey safar wanaagsan ii rejeysey ayey si fiican ii ambabixisay oo I siisay foox, beeyo, iyo waxyaabo kale oo aad u qiimo badan oo ah waxyaabihii ay caanka ku ahaayeen dadkii ku noolaa Dhulkii Udugga. Waxey ii sheegtay inaan waddankeygi tegi doono muddo laba bilood ah dabadeed".

"Sidii ayaan doonidii kusoo fuulay innagoo sidanna waxyaabihii faraha badnaa ee ay ina soo siisay boqoraddu. Waxaana aan waddankeygii imid, sidii ay boqoradu sheegtayba mudo laba bilood ah dabadeed. Boqorkii Faraaciinta ayaan u geeyay hadiyadihii ay iigu soo dhiibtay una sheegay qisadii cajiibka lahayd ee boqoraddii Dhulkii Udugga".

"In kastoo ay sheekadu tahay sheeko xariiro haddana waxaan ka dhadhensan karnaa dhowr maado. Tan koowaad oo ah dhibaatada iyo khatarta ay faraaciintu u mari jireen safaradoodii ay ku aadi jireen dhulkii Udugga. Tan labaad waa sida ay Soomaalidu u soo dhaweyn jireen Faraaciinta oo ku dheehneyd deeqsinimada iyo wanaagga xataa haddii ay iyagu dhibaataysnaayeen (boqoraddu waxay ka taagan tahay qof Soomaaliyeed oo dhibaateysan). Waxaa kaloo ay sheekadu cadeyneysaa in Soomaalidu ahaayeen dad fikirka iyo malo awaalka Faraaciinta aan marnaba ka maqneyn oo ay had iyo jeer sheekeyn jireen.

Prof. Maxamuud Cali Calasow (Jaani)

ILBAXNIMADA ISLAAMKA

SILSILADDA TAARIIKHDA ISLAAMKA



1- Xajarul-Aswad.
2- Albaabka Kacbada.
3- Majaroor.
4- Shaadarwaan.
5- Alxijir.
6- Almultazam
7- Maqaamu-Ibraahiim
8- Geeska uu ku yaal Xajarul-Aswad
9- Geeska Ruknul-Yamaani.
10- Geeska Ruknul-Shaami
11- Geeska Ruknul-Ciraaqi
12- Daaha Kacbada.
13- Calaamad ku toosan Xajarul-Aswad.

Qeybtii 3aad

Dhismihii Kacbada (Masjidka Xaramka)

Culumada Islaamka marka ay taariikhda Islaamka iyo Siirada Nebiga SCW ka warramayaan waxay u sameeyaan gogoldhig ay ku muujiyaan wixii Nebiga SCW ka horeeyey, waxaana looga danleeyahay dadku in ay fahmaan Bulshaddiiuu Nebigu SCW u yimid sidii ay u ekeyd, si aad u garan karto inta ay guurtay bulshaddiiIslaamku u yimid iyo markii dambe sida ay u ekaatay, waxaadna qiimeyn fiican sawiri kartaa Nebiga SCW iyo saxaabadii uu soo saaray iyo mujtamicii Muslimiinta ee abuurmay sida ay u ekaadeen; inta uu u jiray mujtamicii hore ee jaahiliga ahaa, oo marka aad garato bulshada jaahiliga ah suuraddiisa ayaad garanaysaa dadkan inta ay guureen inta ay la egtahay.

Taariikhyahannada Islaamka wax ka qorta qaarba meel bay ka soo billaabaan, qaarkood ilaa Nebi Aadam ayey isku dayaan Taariikh kooban inay ka soo sheegaan, qaarna waxay ka billaabaan Cirka, Badda, iyo dhulka sida Alle SW u sameeyey, qaarna DhalashaddiiNebi Muxamed SCW ayey ka soo qabtaan. Laakiin taariikhahaa hore ee qadiimka ah wax xoogaaga Waxyigu sheegay mooyaane inta badan sax ma wada ahan, si kastaba ha ahaatee waxaannu ku billaabi doonnaa si kooban Dhismihii Kacbada, maadaama ay tahay xuddunta Taariikhda Islaamka.

Sida Alle qur'aankiisa ku caddeynayo kacbada waa Beytkii ugu horeeyey oo dadka loo soo dejiyey waana kan Barakaysan ee Magaalada Maka laga dhisay isagoo hanuun u ah dhammaan Caalamka. Inta badan Culumada Islaamku waxay qabaan in kacbada markii ugu horreysay ay dhistay malaa'ik ka dibna Nabi Aadam (cs). Sida xadiiskii Cabdullaahi ibnu Camar bin Caas (rc) uu Rasuulka SCW ka warinayo Bayhaqina Kitaabkiisa 'Dalaa'ilu Nubuwa' ku soo saarayo, dhismaha Kacbada waxaa Nebi Aadam (cs) ku saaciday Malakul Jibriil oo barbarayey sida wax loo dhiso, markuu dhammeeyeyna waxaa lagu yiri; dadka adaa ugu horeeya, Beydkana kan ayaa ugu horreeya ee ku dawaaf.

(***Guriga ugu horeeyey ee loo soo dejiyey dadka waa kan Maka (kacbada) waana barakaysan yahay waana hanuunka caalamka).*** *Al-Cimran 96*



Sidaas ayaa kacbadu ugu horreyn ku dhisantay, kadibna qarniyo badan ayaa soo gudbayey ilaa uu markii dambe ku burburay biyihii lagu maasheeyey qowmkii Nebi Nuux (cs) marka laga reebo aasaaskii uu dhidbay Nebi Aadam (cs).

Mar labaad waxaa kor u qaaday oo si fiican u dhisay Nebi Ibraahiim iyo wiilkiisa Nabiga Alle ee Ismaaciil CS. Sida nusuusta Quraankuba noo sheegayso;

(xus Markii Nebi Ibraahim uu kor yeelay tiirarka* kacbada *iyo Nebi Ismaciil,* - iyagoo leh - *Eebbow naga aqbal adaa waxna maqla waxna oge) *Al-Baqara 127*

Dhismahaas cabbirkiisa waxaa lagu sheegaa in jooggiisu 9 dhudhun ahaa, ballaciisuna 30 dhudhun, dhererkiisuna 22 dhudhun saanqaafna ma laheyn.

Nabiyullahi Ibraahiim asalkiisu wuxuu ka soo jeedaa dhulka Ciraaq (Iraq) Magaala yar oo saaraan daanta galbeed ee wabiga furaat oo magaceeda la yiraahdo (Ara) waa meel hadda ku aaddan Magaalada Kufa la yiraahdo agteeda, waxaana jira looxaan dhulka laga soo faagay mardhow oo laga helay warar faahfaahsan oo ku saabsan magaala-daan iyo qoyska Ibraahiim CS iyo xaaladooda diineed intaba.

Ibraahiim CS magaaladaan waa ka hijroodey dhinaca magaalada kale ee xaraan kadibna dhulka Falastiin gaar ahaan Magaalada hadda loo yaqaan 'Khaliil' oo isaga markii dambe loogu magac daray ayuu tagay, halkaas oo uu ka dhigtay saldhigga wayn ee dacwadiisa ka fidiyo. Nebi Ibraahiim (cw) wuxuu u bixi jiray safarro dacwo oo uu ku mari jiray dhulka Falastiin oo dhan iyo Shaam qeyb kamid ah iyo meelo kale oo ka baxsan.

Safaradaan dacwada uu ku faafinayo mid kamida Nebi Ibraahiim CS wuxuu ku tagay dhulka Masar, inkastoo warar laga xoog badan yahay ay sheegayaan in Nebi Ibraahim cs uu dhulka Falastiin uga haajiray sannado badan oo abaar ahaa awgeed sidaasna uu ku aaday dhulka Masar. Si kastoo ay ahaataba Nebi Ibraahim CS markii uu yimid Masar iyadoo ay la socoto Sowjadiisii Saara, oo aheyd haweeney aad u qurux badan ayaa waxaa damaaciyey Fircoonkii Masar ka talinayey, xukun adag oo kalitalis ahna ku hayey, isagoo u dagay shirqool ka dhan ah Ibraahiim CS iyo Sawjadiisa sharafta badan ee (Saara), wuxuuna soo amray in Saara ay u timaaddo. Nebi Ibraahim CS markii ay soo gaartay farriintii Fircoon uu u soo faray xaaskiisa, in amarkiisa la yeelana mooyee aanay waddo kale furneyn, wuxuu ku yiri xaaskiisii; *'u tag, oo haddii uu ku weydiiyo maxaad isku tihiin ninkan kula socda; waxaad ku tiraahdaa waa walaalkey'*; - isagoo uga jeeda xagga diinta, isla markaana doonaya inuu uga badbado shirqoolkiisa - isagoo ka cabsanaya in uu dilo ama dhibaato u geysto isaga iyo Sowjadiisaba.

Saara wey baxday iyadoo Ilaahey ku xiran oo baryeysa in Ilaahay dhinac ka mariyo sharta Faajirka u yeeray, Markii ay u tagtay wuxuu weydiiyey ninka la socda waxa uu yahay, waxayna u sheegtay inuu walaalkeed yahay, Ilaaheyna baryadeedii wuu ka aqbalay, oo wax kasta oo uu damacsanaa Ilaah ayaa ka celiyey, Markaa wuxuu ogaaday in arrinka gabadhan uusan caadi aheyn, markaas buu soo diray, weliba wuxuu soo siiyey gabar u adeegta Saara, gabadhaas oo magaceeda la yiraahdo 'Haajara' waxaana la kala sheeegaa in ay addoon aheyd iyo in boqorka laftiisa uu dhalay oo uu soo siiyey Saara si ay ugu adeegto kadib markii uu ka arkay Saara mucjizo wayn oo uu darteed aqoonsaday xariirka wayn ee Saara ay la leedahay Alle, uuna la yaabay fadligeeda iyo sharafteeda

La soco….

W/D: *Haji Cismaan Macalin Ibraahim*

DHALLINYARADA IYO MUSTAQBALKA

MACNAHA NABADDA

Qeybta 2aad

Cunugga yar inta badan maacuunta guriga taal ma baduugo. Hooyadina middi kuma dhufto gurigana dab kuma dhajiyo. Laakiin waxaasoo dhammi waxay u baahan yihiin in ilmaha labaro laguna saacido siduu nabadgelyada doorkiisa uga qaadan lahaa.

Haddaba, haddaan cunug saddex jir ah masuuliyaddii nabad-galyada dusha ka saarnay, maxaad ka filaysaa qof ka weyn. Farrintaasu waa mid cad waxayna qeexaysaa in qof kasta oo adduunka joogaa oo uun wax yar garanaayaa nabad-galyada masuul ka yhay.

Laakiin dadku ma ogyahay in nabadgalyada masuul ka saaran yahay?. Jawaabtu waa maya, waana taas midda nabadgalyada badday “tol iyo taag la’aanta” Maalintaan curinayey qoraalkaan, baan tijaabo yar qaaday. Jid dheer oo dad badanu marayo oo nairoobi ku yaal baan ku socdaalay. Markaan dhawr qof dhaafaba, qof baan joojiyaa. Waxaan dadka weydiinayey su’aal isku mid ah taasoo ahay:-

liga raalli ahow, su’aal ma ku weydiin kara? Markuu i fasaxo baan dhahayey.

Nabadgelyada masuuliyadu ma kaa saaran tahay?

Xaqiiqdii waxaan la yaabay inta ay le’eg tahay baahida loo qabo nabadda iyo masuuliyadda dadku iska saarayo ilaalinteeda sida ay u yartahay. Qaar badan oo dadka ka mid ah waa igu qosleen waana iga dhaqaaqeen, Taasoo aan u qaatay inay u fileen inaan ku jeesjeesayo. Qar kalana waxay ku jawaabeen oraaho is-kudhaw oo micnahoodu ku soo ururayo:

Maxaa nabad naraacshay ma boliis baan nahay.

Gabar u dhalatay dalka kenyana waxay tiri:-

Halkaanu waa kenyo. Haddaad rabto inaad ka hadashid mashaakil nabadeed orad oo soomaliya aad. Micnaha aan gabadhaas ka fahmay wuxuu ahaa in masuuliyadda nabad-galyadu dawlad kaliya lagu hallaynayo.

markii wax laguu sheegaad wax garataa

Intii aanan qormadaan curin, saddex qodob oo waaweyn baa iga qarsoonaa:-

Waa ogaa in khayr oo dhami nabadda ku hoos jiro, laakiin ma ogeyn in nooluhu. Nabadda ugu baahan yahay sida uu oxgen-ka ugu baahan yahay. Waa ogaa in nabaddu ilaalin badan u baahan tahay, laakiin waa iga maqnayd. In qof kasta oo nool xitaa carruurta nabadda xil ka saaran yahay.

Waa ogaa in aan dadweynuhu nabadda ilaalinteeda xilweyn iska saarahayn,

Laakiin ma ogeyn in ay labayaabayaan arrintaas.

4. *Dawladda iyo ilaalinta nabadda*

Tabariish lelin *oo ahaa ninkii kacaankii midowga sofiyeed qarnigii 19aad horaantiisii dhaliyey, baa la weyddiiyey shaqada kowaad ee dawladda u taal?*

Wuxuuna ku jawaabay:-

Waa sugidda nabad galyada.

Waxaa la weydiiyey shaqada labaad ee dawladda u taal?

Wuxuu ku jawaabay:-

Waa sugidda nabad galyada.

Waxaa la su’aalay shaqada saddexaad ee dawladda u taal?

Wuxuu ku jawaabay:-

Waa sugidda nabad galyada.

Waxaa la su’aalay dawladnimoo dhami ma waxay ka bilaabanta kuna dhammaataa sugidda nabadda? Away shaqooyinkii kaloo dhami?

Wuxuu ku jawaabay:-

Wax kasta oo kaleba iyaday ku hoos jiraan. Ma runbaa taasu! Haah, waa run!

Waxaan filaayaa hawlaha qalbigaagu tabayo inay ugu waaweyn yihiin qodobbada soo socda:-

Caafimaadka, Tacliinta, Dhaqaale abuurista, Dhismaha guud, Shaqa abuurista, Daryeelka bulshada, Difaaca dalka, Iyo wixii soo raaca.

Markii dawladu ku guuleysato inay qodobbadaas kor ku qoran samayso, waxaa lagu tilmaamaa inay horumar gaartay. Horumarkuna wax kale maahee waa carruurtii nabadda.

Aslamba ma oran kartid:- qof gaajeysan, jiran, ama jaahil ah baa nabdoon.

Waxaa dadka intii ogeyd garanaysaa in dawladdii soomaaliya ee la burburiyey yoolkeedu ahaa in lala diriro saddexda cadow ee aadamiga curyaamisey, kuwaas oo kala ah:-

Gaajada, Cudurka Iyo jahliga.

Haddaba bal akhristow aan wada eegno jawaabta xaqiiqda ku fadhida ee su’aashaanu u baahan tahay:- haddii dagaal kugu socdo, oo waliba jahooyin badan lagaa soo weerararo, ma waxad oran kartaa waan nabdoonahay?

5. *Nabadda iyo bulshada*

Micnaha ereyga bulsho ku aroorayo waxaan ku tilmaami karaa:- Dad isku xaduud ku nool oo danta guud ka dhaxayso. Mararka qaarkoodna waa la caalamiyen karaa.

Markii laga hadlayo bulshada iyo nabadda waxaa horteenna imaanaya dhowr su’aalood oo ay tahay in jawaabo loo helo.

Su’aasha kowaad waxay tahay:-

Waatee cidda ugu baahida badan helitaanka nabadda? Jawaabta runta ah waxay u egtahay inay tahay *bulshada.*

Su’aasha labaad waxay tahay:-

Yaa ku qasban inay baahida daboolaan? Jawaabta runta ah waxay u egtahay:-

Ciddii baahidu hayso (waa bulshada).

Su’aasha saddexaad waxay tahay:

Bulshadu ma dareensan tahay in *nabaddu* dantooda tahay? Jawaabta runta ah waxay u egtahay:-

Haah, ilaa xad waa dareensan yihiin in nabaddu dan u tahay, laakiin waxayna dareensanayn inay ku qasban yihiin in ay nabadda dhawraan.

Su’aasha afraad waxay tahay:-

Sidee bulshada loo fahansiin karaa inay *nabadda ilaashadaan?* Jawaabta runta ah, waxay u egtahay:-

Waxaa loo baahan yahay in si niyad iyo ficil ah dadka loo wacyi galiyo, oo waliba la suuro galiyo in qof kasta oo giyiga soomaaliya jooga, ama dhagtiisa la maqalsiiyo, ama ishiisa la tuso qoraallo nabadda tageeraya.

Taasuna waxay u baahan tahay:-

Juhdi badan, maalgalin badan, Maskax galin badan, Samir badan, Iyo waliba iskaashi badan.

Su’aasha shanaad waxay tahay:-

Yey tahay inay qabtaan hawshaas magagga iyo qiimahaba weyn? Waa looma kala harin:-

- *Aqoon yahaniintu waa inay maskaxda maalaan.*
- *Maalqabeenku waa inay midigta furaan.*
- *Meediyuhu waa inuu maqal fidiyo.*
- *Dawladduna waa inay meesha ka kacdo.*
- *Dadweynuhuna waa inay maskaxda furaan oo isceebsadaan.*

W/D: Khalif Ashkir Diini

ARAGTIDA INDHEERGARADKA

XAQ DHAWRKA DERISKA



Mawduuceenan maanta waxaaan kusoo qaadaneynaa xaq dhawrka deriska. Deris waa qof walboo aad isku dhowdihiin ee aad meel wada deggantihiin sida guri, suuq iyo xaafad deriska waxa uu isku leeyahay xuquuq aad u ballaaran. Qof walbo qofka uu ka agadhawyahay waa uu kaga xaqnimo badan yahay qofka kale. Derisku waxa uu u baahanyahay in markasta la xaqdhawro waayo waxaa jira xadiith oranaya (Qofkii Alle rumeyey iyo maalinta aakhiro deriskiisa ha xaqdhawro) Soomaalidii hore waxyaabaha ay dhaqan u lahaan jirtay waxaa ka mid ah xaq dhawrka deriska iyo martisoorka. waxaa hubaal ah in ay derisku isaga waxtar iyo faaido badanyihiin dadka walaalaha ah waayo soomaalidu waxa ay tiraahdaa (Oodi Ab ka dhow).

Xuquuqaha deriska

Xuquuqaha uu isku leeyahay derisku wey kala duwan tahay waxaa jira deris hal xaq kugu leh, kaasi waa midka aan muslimka ahayn, laakiin kugu leh xaqa derisnimada. Waxaa kale oo jira Deriska labo xaq leh, kaasina waa midka deriskana kula ah qaraabana kula ah. Sidoo kale waxaa jira deris kale oo saddex xaq kugu leh, kaasina waa deriska xaqa derisnimada, kan muslimnimada iyo kan qaraabonimada kugu leh.

Waxaa wanaagsan deriska in la booqdo xitaa haddii uu dhib yimaado loo gurmadaa'. Waxyaabaha ay derisku isaga baahan yihiin waxaa ka mid ah, marka uu bukoodo in aad booqato, marka laga dhinto in aad Janaasadiisa raacdo, marka uu baahnyahay in aad caawiso, adeegyada yaryar sida biyaha, dabka iyo cusbada in aadan u diidin, in aadan ku dhibin qashinka iyo qaylada, in aadan xumaantiisa faafin wanaagiisana aadan qarin, in haddii laga gar daranyahay aad u hiilliso, in waxyaabaha nolosha caadiga ah ka duwan haddii aad hesho aad qaar u haddiyeyso, in haddii aad xumaan ku aragto ka waaniso, in marka uu kaacawdo aad u garaawdid, in aadan ku dheereyn codka sida raadiyaha iyo talefishinka,in maalmaha farxadda aad ka laqeyb gasho in aad la noqoto qaaraan wadaag, in caruurta aanay dhibin oo aad ka celiso, in haddii uu dambi kaa galo aad cafisid, in aadan ku dhaliilin oo aadan ku caayin shaqadiisa, in haddii uu deyn ama amaah ku weydiisto adan u diidan ee aad siisaa, in aan la xaman ama aan la iskudirin,waxaa wanaagsan deriska in la booqdooo xitaa haddiiuu dhibyimaado loo gurmadaa. Iydoo ay jiraan dhammaan xuquuqahaas aan kor kusoo xusnay ayaa haddana maalmahan dambe la arkayaa in ay lumen xuquuqahaasi ay derisku isku lahaayeen waxaa wanaagsan in uu derisku ogaado in deris la yahay 40 guri oo dhinac walba ka xiga haddaba maalmahan dambe dadku deriska waxa ay ula dhaqmaan si mas'uuliyad darro ah iyagoo weliba mararka qaarkood u geysta waxyeello, sida loo adkeeyey xuquuqda deriska waxa ay xigmadu tiraahdaa (Gurriga halka aad ka iibsaneyso waxaa laga hor mariyaa deriska) waayo haddii aad jaar xun la deristo waxa uu kubarayaa dhaqankiisa xun, waana halka ay soomaalidu ka tiraahdo (Derisku waxa uu ku baraa dhaqankiisa) waxa kaloo la yiraahdaa (Deriskaaga kuma caddeeyo kumana madoobeeyo ee sida uu yahay ayuu kaa dhigaa)

Sheeko 1:

Beri baa nin waxa uu nabiga swc uga soo dacwooday deriskiisa waxa uuna ku yiri nabi allow deriskeygu wey I dhibaan imana siiyaan xaqeyga kaddib ayaa nabiga swc intuu xoogaa aamusay ayuu ku yiri "alaabtaaada ka soo baxso" guriga oo jidka dhexdiisa dhigo si ay dadka kale kuu arkaan ninkiina sidii ayuu yeelay oo alaabtiisa oo dhami jidka ayuu dhigay. Waxaa dhacday in qofkii soo maraba uu weydiiyo sababta uu usoo dhigay jidka alaabtiisa. Marka uu u sheegay in deriskiisa ay dhibaateeyeenna waxa ay dusha uga tuuraan habaar ama caay iyagoo weliba codkooda kor u qaadaaya. Ninkii deriskiisa dhibijiray markii uu dadka hadalkooda maqlay ayuu isku yaxyaxay oo xishooday kaddibna waxa uu ninkii ka codsaday in uu alaabtiisa guriga ku celiyo mar dambana uusan dhibaatayndoonin.

Sheekadan waxa ay nabaraysaa in dadka deriska xalin karaan dhibaatooyinka ka dhex dhaca labo reer oo deris ah oo aanay u baahnayn dad meel kale uga yimmada Haddaba sida aan horey usoo sheegay waxaa wanagsan in aan deriska la dhibaatayn oo la xaq dhawro deriska wanaagsan waxaa lagu gartaa caruurtiisa ayuu kala dar daarmaa deriska in ay ixtiraammaan wayo deriska oo la dhibaatee yo waxaa ka timaado caro alle, haddaba diinteena islaamka dhawr jeer waxa ay inooga digtay in la waxyeelleeyo deriska, Sidaan horey usoo sheegay waxaa wanagsan in aan deriska la dhibin oo la xaq dhawro, deriska wanaagsan waxaa lagu gartaa caruurtiisa ayuu kala dardaarmaa deriska in ay ixtiraammaan waayo deriska oo la dhibaateeyo waxaa laga helaa caro alle, haddaba diinteena islaamka dhawrmar waxay nooga digtaa in la waxyeelleeyo deriska waxaaa tusaale u soo qaadan karnaa xadiithkii nabiga(swc) ee ahaa (Kama suulin jibriil kucelcelinta xaqa uu leeyahay deriska illaa aan moday in uu is dhaxlidoono)Xaqa derisku isku leeyahay iyo waxyaabaha looga baahan yahay in uu ilaaliyo lama soo koobi karo, haddaba waxaan jeclahay in aan sheekadan ku saabsan xaq dhawrka deriska idiin soo ban dhigo.

Sheeko 2

Beribaa nin waxa uu go'aansaday in uu guri iibsado, ugu dambeyn waxa uu helay guri aad u qurux badan islamarkaana ay labada dhinac ka deganyihiin dad aan ladnayn oo guryahoodana ay aad u jajaban yihiin. Ninkii markii uu arkay xaaladda deriska talo ayaa ku laba dhalatay, hase ahaatee waxa uu go'aan ku gaaray ugu dambayntii labada guri ee kale in uu dayctiro si ay isugu ekaadaan gurigiisa iyo guryaha kale oo aysan u kala duwanaanin. Waxa uu durbadiiba ku dhaqaaqay go'aankiisa si uu u meelmariyo waxa uuna labada guri u dhisay derbi dheer oo la'eg kan guriga uu gatay wayo ma uusan awoodin in uu guri cusub u dhiso.

Waxa ay sheekadan tusaale u tahay in derisku kaaga fiican yahay xitaa ehelkaaga. Sidaasi darteed derisku xushmad gaar ah ayuu nagu leeyahay waana in aan xaqiisa ilaalinaa, haddii uu islaam yahay iyo haddii uu gaal yahayba xaq weyn buu nagu leeyahay. Aan kaga dayanno nabiga (swc) xaq dhawrka deriska. Ilaahay ha inaga dhigo kuwii deriskooda dhibaatada ka ilaaliya.

W/D: Geni Cabdisalaam Sheekh Saalax

SOOYAALKA SOOMAALIDA
SOOMAALIDII HORE IYO MAGACYADII LOO AQOON JIREY

Qeybta 3aad.

"Qormadeennii 2aad, waxaan ku soo lafagurnay isirka Soomaalidii hore ka soo jeeday,waxaanna soo sheegnay in isirka Soomaalidu ka soo jeedo firkii Xaam bin Nuux, gaar ahaan Xaamiyiintii reer bariga,waa sida loo badan yahay."

Qormadeenna 3aad, waxaan ku soo qaadaneyna magacyadii loo aqoon jiray Soomaalidii hore, oo ay u aqoon jireen ilbaxnimooyinkii dunida soo maray.

Waxaanna shaki ku jirin in kala duwnaashaha magacyadii loo aqoon jiray Soomaalidii hore uu ka markhaatikacayo maamuuskii iyo melggihii Soomaalidii hore ku lahaan jireen dunida, ummad kastaana ku dadaali jirtay in ay xiriir wanaagsan la yeelato maadaama ay tahay ummad magac leh, isla markaana ku taalla marin halbawle u ah isku xirka ganacsiga dunida ee bariga iyo galbeedka.

Magacyada kala duwan oo ay u aqoon jireen ilbaxnimooyinkii hore ee dunida soo maray dadka iyo dalka Soomaaliya intooda badan; waxay ahaayeen magacyo laga soo qaatay sida badan waxyaabihii ka bixi jiray Gobalka Geeska Afrika, ama muuqaalkii uu lahaa dadkii gobalka deggana.

1-**Faraacinadii Masar iyo magacyadii ay u aqoon jireen Soomaalidii hore iyo dalka ay degto.**

Haddii aan soo qaadanno ilbaxnimadii faca weyneed ee faraacinadii hore ee ka talin jirtay dalka masaar oo la mala-awaalaayo in ay ka mid tahay ilbaxnimooyinka dunida soo maray kuwa ugu filka weyn, sooyaalyahannadu waxay sheegaan in uu kala dhaxeeyay Soomaalidii hore xiriir wax wada qabsi oo ku dhisan dhaqan, wada dhalasho iyo wax is dhaafsi dhinacya badan leh, sidaas ayeyna qabeen faraacinadii hore ee reer masar, waxayna u aqoon jireen Soomaalida magacaya kala duwan, waxaana ka mid ahaa magacyadaas:

- Dhulkii Bonti.(udugga)
- Dhulkii Ilaahyaalka.
- Dhulkii barakeysnaa.

Waxaanna ka dhedhesan kara magacyadaa masaaridii hore u aqoon jireen dadkii deggana Gobalkaan Geeska Afrika,in ay ahaayeen magacya xiriir la leh diimihii ay rumeysnaayeen masaaridii hore iyo waxyaabihii deegaanku caanka ku ahaa,taana waxa lagu sababeeya laba arrimood oo kala ah :

- In ay masaaridu ka soo dhoofsan jirtay dhulka bonti Xabko kala duwan oo masaaridu u adeegsan jirtay siyaaba kala duwan, sida in loogu carfiyo meelaha ay wax ku caabudaan iyo guryaha waaweyn ee Boqorradooda.
- In ay udeegsan jireen in meydka la mariyo inta waxyaaba kale lagu daro oo ilaa iyo hadda aan la garanin.

2-**Ilbaxnimooyinkii Badda cas iyo magacyadii ay u aqoon jireen Soomaalidii hore**.

Ilbaxnimooyinkii ka jiri jiray hareeraha badda cad, sida Finiiqiyiintii,Giriigii hore iyo Roomaanka,waxay safarro ku tegi jireen Gobalka Geeska Afrika, waxayna xiriir ganacsi la lahaan jireen Soomaalidii hore, oo ay u aqoon jireen magacyo kala duwan, sida:

- Dhulkii barbarka, ama barbarooniga.
- Dhulkii udugga.
- Dhulkii aan waxba laga aqoon.
- Dhulkii azaaniya.
- Dhulkii dekadaha fogaay.

3-Ilbaxnimooyinkii hore ee Carabta iyo magacyadii ay u aqoon jireen Soomaalidii hore.

Ilbaxnimooyinkii hore ee Carabta eek a jiri jiray koofuta yaman, gaar ahaan: ilbaxnimadii Saba'a, ilbaxnimadii Micyan, ilbaxnimadii Ximyar, dhammaan ilbaxnimooyinkaas waxa kala dhaxeyn jiray Gobalka Geeska Afrika, xiriir ganacsi iyo wax isdhaafsi, maadaama ay ahaayeen deris wadaag, waxeyna u aqoon jireen Soomaalidii hore magacya kala duwan oo tilmaamaaya waxii ay ka aaminsanaayeen dadka deggan gobalka, waxaana ka mid ahaa magacyadaas:

- Dhulkii Cajamta, oo ay u aqoon jireen waaxa aan carb aheyn.
- Dhulkii Xabashida, oo ay u aqoon dhammaan umadaha deggan gobalka.
- Dhulkii dadka madoobaa oo aan Afrikaanka aheyn.
- Xeebaahaa Zanjiga.

Waxaanna ka dheehan kara kala duwnaasha magacyada loo aqoon jiray dalka iyo dadka Soomaaliya, in Soomaalidu ay dunida ku lahaan jiratay magac iyo maamuus weyn, dunidana laga qadderin jiray.

Ugu dambeyntii waxaan shaki laheyn in kala duwnaashaha magacyadii loo aqoon jiray Soomaalidii hore, uu tilmaamaayo sooyaalkaa filka weyn ee Soomaalidii hore la lahaan jirtay iyo xiriirkii kala duwnaa ee kala dhaxeeyay Soomaalida hore iyo dunidii ka jiri jirtay daafaha caalamkii waagaas jiray, waxayna carabtu ku maahmaahda magacyada badan oo loo bixiyo hal shay, waxay tilmaamaayaan sharfta iyo milggaha shaygaasi leeyahay, sidaa awgeed Soomaalidu waxay weligood ku lahaan jireen dunida maagac iyo maamuus lagu qadderiyo.

W/D: *Prof. Maxamed Cilmi Toxow*

KOBCINTA AFKA IYO NAXWAHA

BARASHADA AFSOOMAALIGA
casharka labaad ee Higgaadda Afsoomaaliga

Casharkii koowaad waxaan ku soo qaadannay isku higgaadinta laba cod ee shaqalka 'A'. Haddana waxaan soo barannay isku higgaadinta saddex cod oo isla shaqalkaas ah.

Maanta qormadeenna labaad ee higgaadda af soomaaliga waxaan ku baran doonnaa akhrinta higgaadda shaqalka 'E' akhriska. Haddii aad ku taxnaato higgaada af soomaaliga ee jaraaidkan billaha ah ee Dhambaalka Cilmiga iyo Dhaqanka aad si fudud ku baran doontaan higgaadda afsoomaaliga.

Higgaadda Shaqalka 'E'

Tusaale:
BE,TE,JE,XE,LE,ME,NE,WE,DE,HE,YE,

Barashada Isku Higgaadinta Laba Cod	Ku buuxi meelaha bannaan shaqalka (A & E)
BE+DE=BEDE	DEG…*DEG*...
DHA+QE=DHAQE	QAR……
BA+RE=BARE	MAR……
MA+LE=MALE	TAG……
QA+RE=QARE	CAB……
CA+SE=CASE	SAC……
YA+RE=YARE	MAL……
SE+DE=SEDE	RAR……
GE+FE=GEFE	CAS……
HE+LA=HELA	XAL……
LE+DA=LEDA	QAD……
DE+GA=DEGA	KAB……
ME+HA=MEHA	DAG……
DE+DA=DEDA	SAC……..
FA+RE=FARE	MAL…….
NA+BE=NABE	BAR……
TA+GE=TAGE	CAS……
KA+BE=KABE	XAR……
WA+DE=WADE	QAD……
FA+LE=FALE	KAB……
	DAG……
	SAM……
	JAR……
	TAR……..
	BADH……..

W/D: Axmed Cabdi-kariin

Qeybtii 2-aad ee Lammaanaha

Dhibaatooyinka Dhallinyarada Maanta xagga qoraalka Afsoomaaliga ka haysta waxaa ka mid ah adeegsiga habqoraalka ereyada lammaan. Waxaan ku hanweynahay in maqaalkaan taxanaha ah ee ka hadlaya lammaanaha uu arrintaas aad wax uga iftiimin doono.

MAGACSALEED + MAGACFALEED

Mahad + celin	=	mahadcelin
Guryo + noqosho	=	guryanoqosho
Dhabar + wareemid	=	dhabarwareemid
Nabad + sugid	=	nabadsugid
Nabaad + guurid	=	nabaadguurid
Xagal + daacid	=	xagaldaacid
Dhaqan + doorsoomid	=	dhaqandoorsoomid
Baqa + cararid	=	baqacararid
Dhir + beerid	=	dhirbeerid
Dhiirri + gelin	=	dhiirrigelin

MAGACSALEED + MAGACSALEED + FAL

Baal + quraan +leh	=	baalquraanle
Bowdo + bari + leh	=	bowdabariile
Abeeso + lugo + leh	=	abeesalugaley
Af + dukaan + leh	=	afdukaanle
Madax + gorof + leh	=	madaxgorofle
Faataa + dhug + leh	=	faataadhugle
Raad + wan + leh	=	raadwanle
Dabo + gaal + leh	=	dabagaalle
San + gaal + leh	=	sangaalle
Af + qurac + leh	=	afquracle

MAGACSALEED + MAGACSALEED + QURUBE

Bar + tilmaan + eed	=	bartilmaameed
Qaanso + roob + aad	=	qaansaroobaad
Berrin + biyo + ood	=	barrinbiyood
Dayax + gacan + eed	=	Dayaxgacmeed
Beer + roob + aad	=	beeroobaad
Diin + ceel + aad	=	diinceelaad
Libaax + bad + eed	=	Libaaxbadeed
Af + carab + eed	=	afcarbeed
Qoob + dameer + aad	=	qoobdameeraad
Ban + geeri + aad	=	bangeeriyaad
Diilin + caan + ood	=	diilincaanood

MAGACSALEED + FAL + QURUB

Geel + jir + e	=	geeljire
Saami + sug + e	=	saamisuge
Habaar + qab + e	=	habaarqabe
War + gur + e	=	wargure
Miino + baar + e	=	miinabaare
Hanti + dhowr + e	=	hantidhowre
Gar + soor + e	=	garsoore
Kabo + tol + e	=	kobatole
Xer + geey + e	=	xergeeye
Xaq + soor + e	=	xaqsoore

MAGACSALEED + MAGACSALEED + SIFO

Caasho+ carrab+ dheer	=	caashacarrabdheer
Ayeeyo + lug + dheer	=	ayeeyalugdheer
Wiiqo + war + dheer	=	wiiqawardheer
Abooto + ido + badis	=	abooto-idabadis
waraabe + lug + gaab	=	waraabaluggaab
Taniyo + tan + buur	=	taniyatanbuur
Geer + gacan + dheer	=	geerigacandheer

MAGACSALEED + QURUB + FAL

Dabo + ka + ruub	=	dabakarruub
Deris + ku + nool	=	deriskunool
Jare + ka + bood	=	jarakabbood
Seef + la + bood	=	seeflabbood
Diilalyo + la + gariirid	=	diilalyalagariirid
Keeb + la + yuurar	=	keeblayuurar
Garab +ku + guur	=	garabkuguur
Gacan + ka + hadal	=	gacankahadal
Tal + ku + nool	=	talakunool
Dabin + ka + dhuud	=	dabinkadhuud

W/D: Prof. Ciise Maxamed Siyaad

ARRIMAHA HAWEENKA & CARRUURTA

Qaybta saddexaad.

Haweenka iyo carruurtu waxay kamid yihiin waxyaabaha loogu jecel yahay dunida, waxaa la siiyaa xaqdhowr gaar ah, waa loo naxariistaa, waa loo debecsan yahay, sababtuna meel fog haka raadin, waa abuuris eebbe, waxaa jira aayad oronaysa; *"waxaa la idin jeclaysiiyay waxyaabaha dadka soo jiita oo ay ugu horeeyaaan haweenka",*

Haweenku waxey hayaan shaqada ugu adag ee qof qabto oo ah korinta iyo heynta carruurta. Waa kuwa ababiya, waxa bara, koriya, isla markaana af bara ragoo dhan noocuu doono ha noqdee. *Geesi, deeqsi, bakhayl, madaxwayne, aqoonyahan, caaqil, suldaan, iyo doqon*. Waxayna haweenku soo saaraan dhammaan dadka dunida jooga oo la'aantood aan la heli lahayn meel ay ka soo unkamaan.

Diinteena iyo dhaqankeenaba haweenka aad ayaa loo xurmeeyaa, waqtiyada dadku colaadaha ku jiraan lama dillo, xoolo la dhacay oo gabar la qabo ka daba timaaddana waa la celin jiray, waxayna udubdhexaad u ahaayeen haweenku nabadda iyo colaadaha reer miyiga ka jiray.

Dhinaca colaadaha waxaa dhici jiray in haweenka oo la xumeeyo ay ka dhalan jirtay colaad aan waxba la isula harin, sidoo kale waxaa ka dhalan jiray haween la dhacay colaad rag badan ku dhinto ama keenta xaalad kudhow.

Taariikhda soomaalida waxaa ugu cuslaa haween la isku qabtay Cabban xuseen Cilmi oo ay isku qabteen garaad Wiilwaal iyo Raage ugaas. Gabadhaas waxay u doonaneyd Raage Ugaas, waxaana Raage oo muddo sannado ah maqnaa kadib ka faa'iidaystay Willwaal oo la aqal galay. Gabadhaan la iskuma dilin laakiin waxay ka tagtay murti iyo macno wayn oo taariikhda gashay.

Gabadha labaad ee rag badani u dhinteen waxay ahayd, 'Samawada Axmed Siciid' oo ay ku dagaalameen, Faarax Afxakame iyo Cali Duulane. Labaduba waxay ahaayeen laba abaandule oo isku heyb ah guud ahaan, laakiin xinif k dhaxaysay. Samawada Cali Duulane ayey u doonaneyd o loo soo diray iyada iyo dhibaaddeedii, laakin waxaa hunguri xumo ah u dhacay Faarah Afxakame, dagaakii k dhashay waxaa la sheegaa inay rag badan ku dhinteen o ay ku jiraan labadii isku qabsatay.

Sidoo kale haweenka waa lagu dhaaran jiray. Ninku marku xilo furo waa laga yeeli jiray wuxuu ku xila furay wax kasto ay tahay, waayo waxaa loo arkayey waxa ka weyn xilafu inaysan jirinba.

Dhinaca nabadda haweenku markii colaadi dhexmaro laba reer waxaa lagu nabdi jiray markii la bixiyo gabar gadob reeb ah, waxayna ahaayeen nabad dhaliyeyaal run ah oo aan colaad ka dambeyn.

Qoyska Soomaalidu waxaa asaas u ah haweenka, waayo raggu waa ay soo xoojiyaan wayna shaqo tagaan, guriga masuuliyadiisa hoose oo dhan waxa haya waa haweenka, raggu inta badan meeshay u hoydaan waxaa uga horreeya haweeney uu doortay kana caawinaysa halganka nolosha. Halkaa waxaa ka dhasha waxa aan u naqaan qoys oo ah nin iyo haweeney isku afgartay inay wada noolaadaan oo dhisaan qoys iska kaashada nolosha iyo isbeddelka dunidda.

Haweenka oo ka kooban dhawr nooc, marka ugu horreysa waa 'inan', marka labaad waa 'Hooyo', marka u dambasana waa 'Ayeeyo'. Saddexdaa heer markii ay ka gudubto oo carruurnimada ay gasho mid walba waa la jecel yahay. Markii ay inanta tahay waa marka ay ugu qurux badan tahay, waa marka ay isu diyaarinayso inay hooyo noqoto, waa marka nin kastaa hammi ka galo oo uu doonayo inay ooridiisa noqoto. Sidaan maqaalladeennii hore ku soo aragnay waa marka loo quuro xoolo oo idil. Marxaladaan haweenku waxay jecelyihiin inay ka gudbaan oo ay noqdaan hooyo.

Markay hooyo noqoto waxay isu beddeshay warshad, waayo waxay dhaleysaa, korinaysaa, oo ay xanaaneyneysaa ubad oo ah waxa ugu qaalisan ee maanta dunida laga helo. Hooyada waa la ammaanay waxaana lagu ammaanay siyaabo kala duwan iyo waqtiyo kala duwan.

Abwaan hadraawi ayaa yidhi .

H*ooyooy La'aantaa Higgaad lama Barteenoo.*
Hooyooy La'aantaa Hadal lama kareenoo.
Ruuxaadan Habinoo, kolba aadan Heesiyo,
Hoobay ku Sabinoo, Hawshaada waayaa
Hanaqaadimaayee.
Hooyoy Taftaadaa Dugsi laga helaayoo.
Hooyoy Dhabtaadaa Hurdo lagu Gam'aayoo.
Hooyoy Dushaadaa Nabad lagu Helaayoo.
Waxa lagu Halmaalaa Hooyo Ababintaadee.
Hayin lagu Baraaraay, Hogol lagu Qaboobaay.
Gogol lama Huraaneey, Dugsi lagu Hirtaayeey,
Hiddo lagu Arooraay !!!!
Inta aad Hooyo Nooshahay Hambalyo Salaan baan
Hanti kaaga dhigaayaa, Habrashiyo Xaqdhawr baan
Dusha kaa huwinayaa, Hooyo Dhimashadaaduna
Hooggeyga waayee, waligay hoggaagaan ka dul heesayaayoo
Hiyiga iyo Laabtaan kugu haynayaayoo
Hengel baan u xirayaa inta haadda duushiyo idil habar dugaageed
Ifka Hibo Ku Nooloow Aakhiro Halkii Roon

Mar kale Hadraawi asagoo Qiimaha Hooyada tilmaamaaya oo ka hadlaaya waxa Hooyada Fiican lagu garto, wuxuu yiri:

Marka aad Nin hooggiyo
ka Hortaga Dagaalkoo
Dabka Hura Bakhtiiyoo
Garta Hubin Yaqaanoo
Xaqa Hoos u Eegoo.
Halista & Colaadaha
Ku Hagoogto Dhiigoo
Dadka kala hagaajoo kala haga
Dhashaa Baa Hooyo Lagu Xasuustaa.

Lo soco qaybta dembe.

Cisman sheekh Axmed.

RAADRAACA CILMIGA IYO AQOONTA

HORUMARINTA MANAAHIJTA SOOMAALIYA



Horuumarinta Manaahijtu waa Furaha horumarka dalka.

Ereyga manhaj waa erey asal ahaan ka soo jeeda afka carabiga, waxaana loola jeedaa jid la qaado, oo ka mid ah jidadka nolosha loo maro, waxaana ka mid ah jidadka nolosha loo maro jidka ababinta iyo waxbarashada, oo ah jidka ugu toosan oo lagu gaari karo horuumarka degdegga ah ee aadamigu gaaro, haddii ay jidkaas falaan ama ay diyaariyaan dad aqoon gaar ah u leh hannaanka ababinta iyo aqoonta laamaheeda kala duwan.

Haddaba haddii ummaddu ka lunto jidka habboon ee nolosha loo maro, ummaddaasi way ka hartaa ummadaha kale ee la qeyrka ah, haddiise ummaddu jid sax ah ku dhisto ababinta iyo waxbarashada ubadkeeda, waaya-aragnimada noloshu waxayna bartay in ummaddaasi ay gaari doonto horuumar degdeg ah iyo mustaqbal wanaagsan.

Fahamka guud ee ereyga Manhaj.

Fahamka guud ee ereyga manhaj, waxa lagu soo koobi karaa in manhaj uu yahay hab iyo hannaan adag oo ummadi degsato, kuna dul dhisto ababinta ubadkeeda soo koraaya, si loo dhiso loona gaaro horumar bulshadu sameysato, isla markaana leh mustaqbal ay higsato.

Qeexidda ereyga manhaj

Manhajka waxaa lagu qeexaa in uu yahay dhammaan wixii waaya-aragnimo ababin ah, oo dugsi u diyaariyo ardaydiisa, fasalka gudihiisa iyo dibaddiisa, si ardayga loogu gacansiiyo korriimo dhammeystiran, oo dhan kasta ah, waxna ka beddeli kara habdhaqanka ardayga iyada oo la raacaayo falsafadda ama aragtida ababinta ee la doonayo in ardayga lagu ababiyo".

Soomaaliya iyo Maanaahijta casriga ah.

Marka laga hadlaayo manaahijta dalka Soomaaliya waxa lagamamaarmaan ah in wax laga xuso sida waxbarashada casriga ah ay Soomaaliya ku soo gashay iyo manaahijtii lagu dhigi jiray waxbarashadaas. Waxa kale oo xusid mudan in loo baahan yahay in aan wax ka ogaanno in waxbarashada casriga ah iyo maanaahijtii lagu dhigaayay ay la socdeen soo gelitaankii gumeysigu uu soo galay Soomaaliya.

1885kii, waxay ahayd markii u horreysay ee Baadariyaashii la socday gumeysigii Engiriisku ay magaalada Bebera ka fureen Dugsigii u horreeyay oo ahaa Dugsi hoose ee ubadka lagu bari jiray waxbarasho casri ah oo ay la socotay kirishtaameyn ubadka looga saaraayay Diinta islaamka, taana waxa ka gadooday shacabkii Soomaaliyeed, waxayna dagaal ku qaadeen Dugsigii iyo Baadariyaashii wax ka dhigaayay oo maalma ka dibna Ingiriisku amar ku bixiyay in ay dalka isaga baxaan si loo dejiyo carada dadka Soomaaliyeed.

1889kii, Dawladdii Ingiriisku waxay ka furtay Dugsiyo hoose ee waxbarashada casriga ah oo lagu dhigaayay manhaj Dawladdii Ingiriisku u dejisay waddamadii islaamka ahaa ee Ingiriisku gumeysan jiray, sida Suudaan, Masar, Yeman iwm. waxaana laga furay Dugsiyadaas magaalooyinka Bebera iyo Bullaxaar oo xilligaas magaalo aheyd. Sidaas ayaana markii u horreysay dalka ay ku soo gashay waxbarasha casri ah oo leh manhaj cusub oo uu dejiyay gumeystihii dalka qabsaday, gaar ahaan goballadii waqooyiga dalka Soomaaliya.

1929kii iyo wixii ka dambeeyay, waxay aheyd markii u horreysay ee uu ka adkaaday gumeysigii Talyaanigu xoogaggii ka soo horjeeday oo dagaalka ba'an kula galay koofurta Soomaaliya, waxuuna billaabay in uu dalka ka furo Dugsiyo raacsan kaniisadihii uu dalka ka dhisay, waxaana markii hore wax lagu baraayay ilmihii ay dhaleen talyaanigii dalka qabsaday kaddibna waxay sameeyeen dugsiyo oorfana ah oo ubadka lagu baraayay waxbarasha casri ah iyo diinta kirishtaanka, waxaana lagu dhigaayay Dugsiyadaas manaahij gumeystihii Talyaanigu uu dejiyay ubadkiisa.

Wixii waqtigaas ka dambeeyay waxbarashadii dalka ka jirtay waxay aheyd waxbarasho ku socotay manaahijtii gumeystuhu dejiyay ilaa laga soo gaaro xornimadii dalka ee 1960kii.

La soco ....

W/D Prof: Maxamed Cilmi Toxow.

ILAALINTA DEEGAANKA & FAYADHAWRKA



Akhristayaal: Waxaynu ku soo jirnay Mowduuceennii ahaa "**Deegaanka & Fayodhowrka**" Annagoo qoraalkeennii hore ku soo qaadannay inaynu kala garanno waxa ay ku kala duwan yihiin macne ahaa iyo dhawaaq ahaan 2-da erey ee kala ah: **Degaan** oo xarafkiisa 2-aad yahay shaqal gaab, macnahiisuna yahay: **Meel** ama **Dhul** ama **Dal** ama **Waddan** & Ereyga kale ee ah: **Deegaan** oo xarafkiisa 2-aad yahay shaqal dheer, macnahiisuna kulmiyo walxo badan sida: Hawada, Biyaha, Dhirta, Kulaylka, Qabowga, Dhulka, Buuraha, Dooxooyinka, Xayawaanka, Daruuraha, IWM.

Akhristayaal: aynu bal dib u jalleecno Kalmadda hore oo ah **Degaan** oo xarafkiiska 2-aad shaqal gaab yahay oo ah Dhul ama Dal, waxaan oran karnaa: waa kan ugu mudan marka la eego walxaha ay kulmiso Kalmadda **Deegaan** ee shaqal dheerka yahay xarafkeeda 2-aad, sababtoo ah **dhulka** ama **dalka** waa meesha uu Aadanaha ama Xayawaanka kale & waxyaalaha kale oo idil ay salka ku hayaana oo ay ku dul joogaan ama ay dul saran yihiin, **Biyaha** waxa ay u baahan yihiin Dal ay dul fariistaan, **Dhirta** waxa ay u baahan tahay dal ay dul saarnaato, **Buuraha** waxa ay u baahan yihiin dhul ay dul saarnaadaan.

Akhristayaal: Waxaynu soo sheegnay in **Dal** ama **Dhul** uusan marka hore lahayn magac lagu kala garto ilaa la helo waxyaalahaas dul saaran oo iyaga magac looga dhingo sida: ***Togdheer*** oo magaca ka helay Togga halkaa ka dillaacay, ***Buur-hakaba*** oo magaca ka heshay Buurta hakaba loo bixiyay ee halkaa ku taal, ***dalka Shabeelle*** oo magaca ka helay Webiga halkaa ka dilaacay ee Shabeelle loo bixiyay, Dhulka Soomaaliya oo magaca ku helay inay dul degeen Dad la magac baxay Soomaali.

Akhristayaal: aynu haddaba ogaanno **Dhulka** ama **Dalka** waxaa uu nooga baahan yahay, **Eebbe-weyne** Markuu dhulka uumaay oo sameeyay, walxaha kale oo Aadanuhu ka mid yahayna ku dul abuuray wuxuu xilka dusha ka saaray Xayawaanka caqliga garasha ah uu siiyay oo ah Aadanaha, eeg oo dhuux Aayadda **29** ee Suuratul-baqara iyo Aayadaha **4-18** ee suuratul-naxl oo ina farayaan in aan iska dhaafno in aan fasaad ku sameyno dhulka dushiisa, taa bedelkeedana aan garanno nicmada uu **Eebbe-weyne** ina siiyay kuna shukrino **Eebbe-weyne**, annagana is xaq-dhowrno, kuna dhaqanno oo raacno amarka **Allah Subxaanahu Watacaalaa**, eeg Xadiiska Rasuulka (SCW) oo macnahiisu yahay "Malaku Jibriil marna kama tagin inuu igala dardaarmo deriska ilaa aan is iri: derisku wey is dhaxlayaan miyuu dhi doonaa " & Xadiiska kale ee Macnahiisu yahay "**Eebbe-weyne** isaga ahaantiis dulmi wuu iska xarrimay inuu sameeyo, adinka ayuuna idin soo dhex dhigay dulmiga, isagoo idiin sheegay inay xaaraan tahay in aad is dulmisaan, ee ha is dulminina" .

Akhristayaal: Waxaa haddaba ilaalinta fayodhowrka **Degaanka & Deegaanaka** ka mid ah ku dhaqanka shareecada diinta islaamka & xeerarka kale ee ummaddu degsato, si looga badbaado isku dhac bulsho oo keena fasaadka **Degaanka** dalka, eeg Aayadaha: **17, 21** ee Suuratul-jaathiya.

Akhristayaal: Markii Sharciga & Xeerarka Dalka lagu dhaqmi waayo oo loo hoggaansami waayo, qofka mas'uulka ahina halkii uu sharciga ka ilaalin lahaa uu is yiraahdo: Qofka madaxda kuu ah raalli geli si aad maslaxaddaada gaarka ah u ilaashato adiga & isagana isugu daneysataan, waxaa halkaa ka billowda: in si sharci darro ah loo dhaqmo oo 2-dii mas'uul ee meel ugu sarreysaba ay ku tuntaan mas'uuliyiinta kale, in la galo xatooyo xoolo qaran, xil ka qaadis lagu sameeyo qofkii wax sheegaba ee sharciga ku yuurursada, waxaana badata isu caroosho & isu ciil kaambin, dil, Sino, Dhac dad kale xoolahooda, eex & nin jecleysi, IWM. Waxaana la waayaa cid macruufka farta munkarkana joojisa, markaasay dadku yiraahdaa: adduunyadii baa gaddoontay oo is badashay, markaasay timaaddaa digniinta aayadda: **11** & **12** ee Suuratul-racdi iyo **54** ee Suuratul-anfaal, waxaana xigta aayadda: **25** ee isla suuratul-anfaal iyo **112** ee Suuratul-naxl, waxaana lagu gunaanadayaa aayadda **16** ee Suratul-israa'.

Haddaba Akhristayaal: Dunidatani waxaa sameystay annagana nagu dhex beerey **Eebbe-weyne** sharci buuna u sameeyay la raacayo wuuna inoo sheegay cawaaqib xumida Adduun & Aakhirab leh ee ay la kulmi doonto ciddii xayawaanka caqliga leh ka tirsan ee sharcigiisa raaci weyda, sharcigaasoo ay mar waliba fasiraad & sheeg-sheegid la daba taagan yihiin ragga aqoonta dheeraadka ah u leh.

Akhristayaal: aynu garanno oo mar waliba ku baraarugsanaanno in dunida oo hagaagta **Rabbina** ka ajir siiyo ama xumaata **Rabbina** ka caroodo kuna ciqaabo ay ku xiran tahay falka aadanuhu ku kaco oo marka hore ku billowda si keli-keli ah, marka dambana la is qaadsiiyo oo bulshada wada gaara. Sidaa darteedna ay qof kasta oo bulshada ka tirsan waajib ku tahay inuu is ilaaliyo oo is hagaajiyo si ay bulshada ugu dayato, hagaag bushana loo gaaro oo guud.

. *La soco ….*

Prof: Cali Sh.Maxamuud Gacal

ARRIMAHA DHAQANDHAQAALAHA

DEEGAANKA IYO DHAQANDHAQAALAHA

Haddii aan marka hore qeexno ereyga deegaan waa meel laga helo noole iyo ma noolaba lagana heli karo nolol dhan walba ah oo ku saabsan jiritaanka aadmiga noloshiisa iyo inta la xiriirtaba, waxaana u kala qaadeynaa labo qeybood oo kala ah noole iyo ma noole waxayna kala yihiin:

NOOLE: waa dadka duunyada iyo dhirta

MA NOOLE: waa Dhagxaanta, Carrada, Biyahaha, iyo hawada, Sida aan soo sheegnay dhulka korkiisa deegaanka ku yaalla ee aan laga heli Karin qodobada aan kor kusoo xusnay ee aan looga maarmi Karin nolosha guud ahanteed laguma magacaabi karo deegaan, sidoo kale waa ilaalinta caafimaadka guud ee bulshada ku nool deegaanka labadooduna wey isku xiran yihiin oo ma kala maarmaan, waxyaabaha lagu sameeyo deegaanka dushiisa ee ka yimaada inta kunool oogadiisa baa dib ugu soo laabato noloshooda, guud ahaan haddii ay ahaan lahayd dhanka bulshada iyo dhanka deegaanka dhaqaalahoodaba.

Heerka Garaadka Bulshada ku nool Deegaanka:

Marka la fiiriyo deegaanka waxa uu u muuqaqnayaa ama laga dheehanayaa saameynta ay ku reebeen bulshada dushiisa ku dhaqan, waana midda caddeyneysa heerka uu gaarsiisan yahay wacyigooda guud ahaaneed.

Haddii uu hormarsan yahay deegaanku waxaa ka muuqanaya calaamadaha horumarka iyo aqoontooda sidoo kale haddii ay dib udhacsan yihiin waa astaan sheegeysa sida ay u dambeeyaan waxaana laga arkayaa hannaankooda dhaqan dhaqaale ee ay ku nooshahay bulshadaasi.

Bulshada soomaaliyeed waxa ay lahaayeen dowlad dhexe oo u taagneyd ilaalinta deegaanka iyo faaya dhawrka bulshadooda meel walba oo ay ku noolyihiinba, balse waxa aan ka xumahay dhaawaca ku yimid dawladnimadii, sannadkii 1991kii waana mid keentay in aan ka hadalno 25sano kadib cinwanka aan maanta qalinka u qaatay oo aan doonayo in aan kaga hadlo soo celinta ilaalinta deegaanka iyo fayadhawrka bulshada soomaaliyeed, waxaan halkan ku xuseynaa sidii dib loogu soo celinlahaa wacyi gelinta bulshada soomaaliyeed, loona gaarsiin lahaa farriimo qoraal ah oo sare loogu qaadayo wacyi guud ahaaneed lana socdo hadba meesha ay mareyso noloshooda caafimaad iyo tan deegaanba xigmad baa waxay ahayd (Kahortaggu waxa uu ka fiicanyahay is daweynta)

Walaalayaal waxaa nagu waajib ah in aan dib u eegno meesha ay ku suganyihiin deegaankeena iyo fayadhawrka bulshadeena, waxaan hubnaa dhibaatooyinka kajira deegaanada soomaalida, gaar ahaan badda, daaqa iyo caafimaadka sida aan ognahay cilmibarista la xiriirta caafimaadka iyo deegaanka waxa ay ku xiran yihiin falalka laga sameeyo deegaanka in ay waxyeello weyn gaarsiinayso cimillada, sida roobabka, haddii roob la waayana waxaan ogsoonnahay in aysan jireyn wax nolol ah. Dad, duunyo iyo daaq toona, sidoo kale waxaa iyana meesha ka baxaya dalagga beeraha nooc kasta oo uu ahaadaba.

Inta aan soo sheegay waxaan u baahanahay in laga hor tago sidii loo joojin lahaa ama loo yareyn lahaa sida aan ka warhayno bulshada soomaaliyeed waa dad xoolo dhaqato ah waxayna daba joogaan doogga iyo biyaha oo xoolohoodu u baahan yihiin, meeshii laga sheegana wey u guuraan xudduud celisana ma jirto, deegaankii ay ku dhaqnaayeena waa la xaalufiyey gebi ahaantiisa, waxaana dhammaaday daaqii ay xooluhu u baahnaayeen, waxaana imaaneysa in xooluhu dhammaadaan marka xooluhu dhammaadaanna waxaa ku xiga in dadku dhammaado

Sidoo kale waxa jira nadaafad xumo iyo faya dhawr la'aan soo wajahda bulshada ku nool magaalooyinka waa weyn ee dalka.

Guud ahaan waxaan garawsanay in ay dhibaato ka jirto dhanka deegaanka iyo faya-dhawrka bulshada, waxaana ognahay dhibaatadaasi waxa keenay nidaamkii dawliga ahaa oo meesha ka baxay oo ruux walba oo bulshada kamid ah sidii uu doono ayuu sameeyey, geedka uu doono ayuu gooyey meel kastana qashin ayuu ku shubay sidaas darteed waxaa loo baahanyahay in lagu tallaabsado labo arrimood oo kala ah:

1. In la wacyi geliyo bulshada soomaaliyeed
2. In hay'adihii dowladda ee ka shaqeyn jiray ilaalinta deegaanka iyo fayadhawrka shaqadooda qabtaan.

Akademiyada Cilmiga Fanka iyo Suugaanta waxa ay cilmi baaris ku sameyn doontaa daraasaad la xiriira dhan walba oo waxyeello ka jirto oo ah ilaalinta deegaanka iyo faya-dhawrkaba, sida aan ka warqabno markii ay dhacday xukuumaddii kacaanka shaqada mashaariicda dalka laga fulinayey waxay ahaayeen kuwa aan lagu sameynin sahan ama u fiirsi dheer ee waxa ay ku saleysnayeen qaab qabiil ama deegaanku uu sameysanayey, waxaa kamid ahaa waxyaabaha sahlayey in dhirtu ku yaraato ama xaaluf noqoto waxaa ugu waaweynaa in laga qodo Ceelal iyo Barkadaha Biyaha, taasina waxaa ka abuurmay labo arimood oo kala ah:

1. Goobahaasi in ay magaaloobaan dhulkii iyo carradiina ay budul noqdaan, markii roobku da'ana uu dib ugusoo bixi waayo calafkii xoolaha waayo waxaa dhalanaya carro guur faro badan.
2. Dhulkaas waa magaaloobayaan dhirtii ku tiilayna waxa ay ku qeybsameysaa labo qaybood oo midda hore loo isitcmaalayo gurigeynta oo dhismo looga sameynayo, ileyn qof walba waxa uu ka dhisanayaa inta kale ee soo hartay dhirta waxaa loo goosanayaa qoryo shidasho si wax ugu karsadaan sidaasna deegaankii deg-deg ku nabaad guuro.

Dhulka soomaalida wuxuu leeyahay dhir daaq ay xooluhu ka helaan calafka ay cunaan.

Haddii aan la ilaalinna waxyeello fara badan ayaa ka dhalanaya isla markaasna saameyn iyo isbeddel cimilo ayey nabaad guurintaasi keeneysaa, waxaana ku yaraanaya roobabka, oo waxa ay beddelaan cimilladii caadiga ahayd iyo middii aana caadiga ahayn labadaba.

Degaanka aan ku noolnahay waxa uu u baahanyahay in si taxaddar leh looga ilaaliyio qashinka oo keeni kara dhibaato caafimaad xumo lana soo gudboonaato faya qabka bulshada ku dhaqan degaanka.

Maanta dalka soomaaliya ma jirto cid ilaalisa caafimaadka bulshada iyo faya dhawrka xigmad ayaa oranaysa "Inta uu qashinka kuu jiro ayuu cudurku kuu jiraa" waxaana ka dhalan kara cudurrada dabar jara bulshada guud ahaan, waxaana ka mid ah cuduradaas shuban biyood daacuunka Ebbe ha inaga hayee.

Waxaana xusid mudan in maanta ay jiraan goobo fara badan oo qashinka iyo wasakh ay buuxaan dhaafiyeen cidna aanan qaadin karin, waxaana laga qaadi Karin oo ilaashanaya bulshada ku dhaqnayd degaankaas, Isla kolkaasna dacweynayo maa nala siiyo lacag, waxaa la yaab ah oo aan isweydiinayaa dadka diidaya in la qaado qashinka miyeysan ogeyn dhibaatada iyo waxyeellada qashinka? Sida aan ognahay bulshada wax allaalle wixii ay u sameeyaan fal ahaan in ay dib ugusoo laabanayso waana mid horay loo soo arkay xumaanteeda.

Sidaas darteed waxaan soo jeedinayaa in laga fogaado waxyeeleynta lagula kacaayo dhulka, badda iyo hawada dhammaan arrimahahaas aan kor kusoo xusay waxa ay caddeynayaan in aan marna laga maarmin bulsho ahaan ilaalinta caafimaadka.

WD: C/qaadir Maxamed Cali

XIRIIRKA WADDANKA IYO WADDANIGA

Boggeennan aan kaga hadalno waddaniyadda waxaan bishii hore ku daahfurnay waddaniyadda iyo waxa ay tahay, iyo weliba waxa ay ku kala duwan yihiin xiriirka waddanka iyo waddaniga ka dhexeeya.

Waxaan bishan qormadeenna ku gudageli doonnaa taariikhdii dadkii waddaniyiinta ahaa iyo tilmaamahoodii kudayashada mudnaa ee ay sooyaalka soomaalida baalka dahabka ah kaga galeen.

AXMED IBRAAHIM (AXMED GUREY)

Halyaygii Soomaaliyeed ee Axmed Ibraahim oo ku magac dheeraa "Gurey". Waxa uu ku dhashay Tuulo ka tirsan Gobolka Harar oo la yidhaa "Hobata", sannadku markuu ahaa 1488kii. Yaraantiisii Aabbihi wuxuu u dhiibay nin la oran jiray Cadal oo ahaa Addoon u shaqeeya, kaasoo Axmed Gurey baray Xeeladaha Dagaalka. Waxa uu ku barbaaray magaalada Harar, waxana uu ka galay Dugsi Qur'aan.

Waxa la sheegay in uu ahaa wiil firfircoon oo ay ragnnimadu dibedda uga soo baxday. Isaga oo aan aad u korin ayuu aabbihiis dhintay, hooyadii ayaa u qaadday Seylac. Seylac, waxa uu ka sii wadey halkii barashaddiiQur'aanka iyo Diinta Islaamka. Intii uu Seylac joogay ee uu dhallinta ahaaba waxa dadka u muuqatay ragannimada ka soo socota iyo dadaal badnaan. Markii uu weynaadayna waxa ka soo shaac baxay haybad iyo firfircoon. Axmed Gurey waxa kale oo uu caan ku noqday fikrad toosnaan, hoggaamin iyo halyeynimo uu si gaar ah ugu muuqday nidaaminta iyo ururinta ciidamada. Axmed Gurey wuxuu guursaday Naag magaceeda la oran jiray Daloonbiro oo uu dhalay amiir Maxfuud la oran jiray oo Saylac xukumi jiray, taana taageerayaal badan ayuu ku helay.

Ugu horreyntii Axmed Gurey ciidan aan aad u badnayn ayuu ka unkay magaalad Seylac, markii ay aad u korodhay cabsidii laga qabay in Boqorradii Xabashidu ay weerar ku soo qaadaan dhulka Soomaaliyeed.

Axmed Gurey, waxa uu intaa kaddib u guuray gobolkii Soomaaliyeed ee la oran jiray Cadal oo ay ka dhisnayd dowlad xoog lihi. Halkaas waxa uu ka sii waday ururintii iyo xoojintii ciidamada. Muddo aan badnayn waxa uu isu keenay ciidan Soomaaliyeed oo xoog leh. Axmed Gurey iyo shacbiga Soomaaliyeedba waxa ay la socdeen oo ka warqabeen in boqorkii boqorrada ee Amxaaradu uu heshiis la galay Boortaqiiska, oo waagaas ka mid ahaa dowladihii Yurub ugu xoogga weynaa. Heshiiskaasi waxa uu ku salaysnaa in dowladda Boortaqiisku gacan ku siiso Amxaarada in la tirtiro ummadaha Islaamka ah ee Geeska Afrika.

Sababtaa darteed, ayaa ku kaliftay Axmed Gurey in uu taageero weydiisto dawladdii Islaamka ahayd ee Turkiga. Waxana uu Turkigu ugu ballan qaaday in uu gacan siin doono, hase yeeshee, ma ay noqon mid u dhiganta kaalmadii uu Booqtaqiisku siinayey Amxaarada.

Axmed Gurey dagaalladii ugu horreeyey ee ay xabashida foodda isdaraan, waxa uu bilowday 1521kii. Waxa jirtay in muddo ilaa toddoba sannadood ah dagaalka ka dhex socday ciidankii Axmed Gurey iyo kuwii xabashidu aanay ahayn qaar sidaas u waaweyn. Goob kasta oo la isku haleelana, waxa si aan shaki ku jirin ugu gacan sarreyn jiray ciidankii Soomaaliyeed ee geesigii Axmed Gurey.

Dagaalladaa kuwii ugu qadhaadhaa ee ka dhex dhacay ciidankii Gurey iyo Xabashidu waxa ay billaabmeen 1528kii. Waxa dagaalladaasi ay ka bilaabmeen Harar geesteeda Koofur-Bari. Halkaas oo ay ku yaalleen meelo ay Xabashidu Soomaalida ka qabsaday muddo aan waqtigaas ka fogeyn.

Waxaana dagaaladaa ugu waaweynaa:-

1- Dagaalkii Caqam iyo Aldiir

Dagaaladaasi waxay dhaceen 1527-dii, sababtii dagaalkaa keentayna waxay aheyd ciidamo xoog badan oo masiixiyiin ah ayaa waxay isku dayeen inay qabsadaan dhulkii soomaaliyeed ee Muslimka aha, waxaana ciidankaa hogaaminayey nin la oran jiray Dajaljaan, kaasoo xidid la ahaa boqorkii Xabashida waqtigaa u talinayey. Ciidamadaa xoogga badan waxay galeen magaalooyin soomaaliyeed oo dad muslim ahi deggenaayeen, dhammaan magaalooyin-kaana way boobeen wayna qabsadeen, waxayna qafaasheen haween badan oo ay ku jirto xaaskii amiirkii xilligaa u talinayey gobolada Soomaaliyeed ee Itoobiya, kaas oo la oran jiray Amiir Abuubakar. Arrintaa waxaa ka gilgishay Imaam Axmed Gurey, wuxuuna ka hor tagay isagoo wata ciidam xoog leh Muslimiin ah oo uu wado Imaam Axmed Gurey. Waxayna isaga horyimaadeen meesha la yiraahdo Diir, wuxuuna dagaalkaasi ahaa meel faraha lagaga gubtay, waxaana gacanta sare ku yeeshey Ciidamadii uu watay Imaam Axmed Gurey, Ciidamadii Xabashidu waxay noqdeen wax la dilay, wax cararay iyo wax la soo qabtay. Tirada ciidamada la soo qabtayna waxay dhamaayeen 500 oo maxbuus. Axmed gurey wuxuu soo noqday isagoo guulaystay oo faraxsan. Xilligaana da'diisu waxay aheyd 21 jir.

wixii xilligaa ka dambeeyey dagaalladii dhexmaray Soomaalida iyo Xabashida may joogsan oo way is-raac-raaceen, haba kala waaweynaadeene. Waxaana dagaaladaa ka mid ahaa; Fadhijaar, Qiicxayi, Ambaariya oo ka wada dhacay meesha Dawaari la yiraahdo iyo agagaarkeeda, iyo Ifaad. Ciidamada Axmed Gurey waxay dagaalkaa Ifaad oo dagaalladaa hore ka xoog badnaa ku qabsadeen boqorkii xabashida xukumayey ina Abtidii, waxayna kaga iibsadeed 50 wiqiyadood oo dahab ah, waxayna halkaa ku gubeen kaniisado badan.

Sidoo kale Imaam Axmed Gurey wuxuu halkaa ku qabsaday magaaladii uu ku dhashay oo ku jirtay gacanta Xabashida, waxaana la oran jiray Jandabalah. Dadkii magaaladaa deggenaa waxay ugu deeqeen xaaskii Imaam Axmed Gurey oo la oran jiray Daloonbira, 20 wiqiyadood oo Dahab ah. Haseyeeshee Imaam Axmed Gurey Xaaskiisa haddiyadaasi wuu u diiday wuxuuna ku iibsaday 100 seefood oo dagaal, waxayna kaga qeyb galeen dagaalkii Shaysakuura.

W/D: C/qaadir Nuur Xuseen (Maax)

DHIBAATOOYINKA ABAARAHA

Soomaaliya waxay u dhaxeysaa Abaar & Fatahaad

Qormadan waxaan uga hadlaynaa muhiimadda uu leeyahay Juquraafi ahaan dhulka soomaaliya iyo sidoo kale hantida iyo kheyraadka rabbaaniga ah ee uu Allaah ku manneystay sida Badaha, Webiyada, Xoolaha iyo Macdanta.

Balse shacabka soomaaliyeed ma daneeyaan hantidaas uu alle ku manneystay wayna ka baahanyihiin, sida hore loo yiri (HADDII NABI AADAM LASOO SAARI LAHAA WUU NA GARAN LAHAA), oo loola jeedo inaanu dhulkaan dihan laga shaqeyn oo aan waxba laga beddelin sidii uu ku ogaa. Dadka soomaaliyeed waxay noqdeen kuwo suga mar walba gargaar shisheeye oo aan awoodin inuu muruqiisa maalo oo uu baahidiisa haqabtiro, taas ayaana keentay in mar walba shisheeyuhu go'aanka ugu dambeeya ay lahaadaan, waayo qofkaan quudkiisa haysan go'aankiisa ma gaaro. Soomaaliya waa dal dhaca Geeska afrika, waxa uuna sohdimo dhuleed uu la leeyahay dalalka Jibuuti, Kiinya iyo Itoobiya, sidoo kale waxaa bariga ka mara Badweynta Hindiya, waqooyiga waxaa ka xiga gacanka cadmeed. Soomaaliya Waxay leedahay xad badeedka ugu dheer qaaradda Afrika. Waxaa kala duwan qaabka dhulka kuwaas oo kala ah Buuro, Dul iyo Bannaan.

Soomaalidu waxay sannadka u qeybisaa ilaa afar xilli waxayna kala yihiin :-

1. Xilliga (Gu') wuxuu billowdaa 21 Maarso wuxuuna ku egyahay 21 Juun ama billowga Luulyo, waa xilliga uu da'o roobka mahiigaanka ah, waxaana xilligan ay dadka soomaaliyeed ay beertaan khudaarta nuucyadeeda kala duwan, badarka iyo sisinta.
2. Xilliga (xagaa) wuxuu billowdaa 22 juun wuxuuna ku egyahay dhammaadka Agoosto, waana xilli neecaaw qabow oo aan kuleyl badneyn, xeebahana waxaa ka da'a roobab.
3. Xilliga (dayr) wuxuu billowdaa 22 sebtember wuxuuna ku egyahay dhammaadka disember, waxaana da'a roob yar, sidoo kale waxaa jira dabaylo.
4. Xilliga (jiilaal) wuxuu billowdaa 21 disember wuxuuna ku egyahay 20 maarso waana xilliga ugu kulul

Roobka wuxuu ka mid yahay ilaha biyaha ay ka helaan dadka soomaaliyeed, balse roobka ugu badan wuxuu ka da'aa Koofurta dalka iyadoo ay xusid mudantahay inuu sii yaraanayo roobka markasta oo waqooyi lasii aado iyadoo sababta loo badinayo yaraanida dhirta xilliga ugu roobka badani xilliyadana uu yahay Guga sidaan hore usoo sheegnay.

Waxaa alle ku manneystay soomaaliya laba Webi oo waaweyn oo ka yimaada buuraleyda Itoobiya waxayna kala yihiin sidan:

1- Webiga Shabeelle oo mara bartamaha & koofurta dalka, waana wabiga ugu dheer, wuxuuna dhererkiisu gaarayaa **1500** km, balse wuxuu dalka ka maraa **800** km oo gudaha ah.
2- Wabiga Jubba oo isna mara koofurta dalka, wuxuuna dherer ahaan gaarayaa 1600 km, labadan wabi ayaa ku kulma gobalka Jubada dhexe ugu dambeyna waxay ku dhammaadaan Badweynta Hindiya.

Abaarta waxaa keena roob yaraan, waxaana uu raadkeedu billaabanayaa marka roob la waayo, waxayna ku billaabanaysaa si sibiq ah waxayna soconaysaa muddo, waxaa qallalaya oo engagaya ilihi biyaha laga heli jiray, sidoo kale waxaa fashil uu ku imaanayaa dalagdii bixi lahaa, waxaa baahi u baqtinaya xoolihi, sidoo kale dadka ayaa caafimaad ahaan liidanaya. Abaartu way kusoo noqnoqotaa qeybo ka mid ah dalka, sannadkii **1964** waagii ay dalka ay maamuli jirtay dowladdii rayidka waxaa dhacday abaar loogu magac daray Baastooley, waayo dadku waxa kaliya ay cuni jireen ayaa ahaa baasto.

Markii uu kacaanku dhashay kadib sannadkii **1974** waxaa dhacday Abaartii xumeyd ee loo bixiyay DABA DHEER ee ku dhufatay qeybo ka mid ah dalka haba ugu darnaatee Goballada dhexe, balse gurmad & dadaal ay bixisay dowladdii millitariga ayaa loogu gurmaday dadki ay waxyeellaysay abaartaas.

Intaas kuma ekaan abaartu way soo noqotay markii ay dowladdii dhacday sannadkii **1992**, taasoo dhalisay macluul daran waxaana socday dagaallo sokeeye oo lagu hoobtay, waxaana soo gurmaday dowlado badan oo caalamka ka kala yimid oo ay hogaaminaysay Qarmada midoobay.

Sababaha keena in abaarta & macluusha soo noqnoqdaan waxaa ka mid ah:-

- Roobkii xilliga ee la filayay oo yaraada taasoo keeneysa in beeralaydu aysan waxba beeran sannadkaas
- In roob di'i waayo ama uu Dib u dhaco xilligi la sugayay
- Dagaallada & dambiyada Alle laga galo oo sabab u ah roob la'aantaas
- Dadka soomaaliyeed kama faa'iidaystaan dhibaatooyinki hore usoo maray
- In had & jeer la sugo gacmo shisheeye oo aan lagu baahi beeleyn
- Ma jiro qorshe qaran oo u degsan dowladda si looga hortago aafooyinkan

Marka abaaraha laga soo baxo oo uu Alle samada roob ka keeno ayaa haddana waxaa dhacaya fatahaado iyo daad waayo webiyadi ayaa butaacaya oo buux dhaafaya sababayana inay baaba'aan deegaanno badan, dalagguna uu xumaado.

Sababaha keena fatahaadaha waxaa ka mid ah :-

- Biyaxireennadii lagu keydin jiray biyaha ee gobalada hiraan, sh/dhexe & sh/hoose oo dumay ama aan muddo dheer la dayactirin.
- Roobka da'aya oo mahiigaan ah oo keenaya biya aad u badan
- Ma jiro qorshe & istaraatiijiyad looga hortagayo fatahaadaha
- Fatahaadaha waxaa ka dhasha raadad xun waxaana ka mid ah:-
- Khasaaro naf & maal leh oo soo gaara dadka & duunyada
- Biyaha oo wasaq noqda oo isu beddela biyo aan la cabi Karin
- Waxaa ku faafaya deegaannadaas cuduro sida fuuqbaxa
- Waxaa go'aya waddooyinka isku xira tuulooyinka & magaalooyinka
- Si looga hortago abaaraha & fatahaadaha soo noqonqda waa:
- In Allah loo noqdo maxaa yeelay balaayadu dambi alle ayay ku timaadaa towbana waa lagu qaadaa
- In la joojiyo dagaallada maxaa yeelay dagaal wuxuu yahay waa soo ogaanay
- In la dajiyo qorshe fog oo mustaqbalka looga hortagayo aafooyinkan
- In la joojiyo dhirta la jarayo taasoo keeneysa xaalufinta deegaanka
- In la abuuro mashaariic waaweyn oo biyo xireen ah oo laga dhaliyo koronto, xoolahana uga waraabaan, si biyaha cidlada ku dhamaanaya looga faa'iideysto.
- In la kordhiyo wax soo saarka gudaha dalka si gaajada & baahida badan looga hortago.
- Ugu dambeyn haddan lagu baraarugin aafooyinkan waxaa sii socon doona dhibaatooyinka daad ee xilliyada roobka iyo sidoo kale gaajada & macluusha xilliyada abaarta ee roob la'aantu dhacdo, waxaana dhab noqonaya weedha ah "DAL QANI AH OO DADKIISUNA KA BAAHANYAHAY " .

W/D: Yuusuf Xasan Maxamuud

AHMIYADDA AKHRISKA IYO XUQUUQDA QORAALKA

HABQORAALKA SHEEKADA

Taariikhda sheekada gaaban iyo waqtigii ay bilaabatay weli waa wax shaki ku jira, waxayse runtu tahay inay ka soo shaac baxday dhaqammo aan suugaantoodu qorrayn ee afka uun ku ekaa. Sheekooyin qoran oo ku siman ilaa dhalashaddiiNebi Ciise ka hor ayaa laga helaa Baybalka cahdigii hore. Sidoo kale waxaa sheekooyin waqtigoodu fog yahay laga helaa kutubka jaamaca ah ee Quraanka.

Sheekooyinku xiisihii loo qabay dartiis ayey jiiteen dhugmadii dadka qarni kasta ama bulsho kasta ha ku jireen eh. Ilbaxnimada ka hor waxay dadkii hore isugu soo ururi jireen dabshidyada xaafadahooda, waxayna iska martigelin jireen sheekooyinka la xiriira waayo aragnimadooda maalmeed, ha ahaato, sidii midkood ugaar u soo dishey ama sidii midkood libaax ay is haleeleen uu uga adkaaday. Casrigeennan cusub waxaynu isku maaweelinnaa filimada, raadiyaasha, iyo telefishinada, kuwaasoo ina tusayo ama inoo sheegaya nooc sheeko, haba ka casrisanaadeen noocyadii hore ee sheekoo tebinta eh.

Jacaylka iyo xiisaha ay bani'aadamku u qabeen sheeko tebinta iyo dhegaysigeeda, waxay keentay caan bixiddii sheekada gaaban. Ninkii uga horreeyay oo qiimaha ay sheekada gaabani leedahay iyo kaalinta ay kaga jirto suugaanta magoogasho (Imaginative literature) sharxaa, wuxuu ahaa qoraa Maraykan ah oo la oran jirey Edgar Allan Poe.

Sheekada gaabani waa nooc tiraabeed oo mala-awaal ah.Waa nooca ugu sahlan suugaanta magoogasho xagga dhismaha iyo dhererkaba.Akhristayaashu sheekada gaaban ayey ka door bidaan noocyada kale ee male-awaalka, waayo wey ka dhib yar tahay xagga fahamka iyo dareen jiidadkaba. Haddaan sheekada gaaban dhinac dhigno noofalka waxaan dareemaynaa in sawiraddeedu ka sahlan tahay kana bayaansan tahay tan noofalka.Tirada jilayaasha, dhacdooyinka, Degaamada iyo muddooyinka sheekada gaabani wey ka xaddidan yihiin.

Sheekada gaabani waxay dooxdaa dhacdo weyn oo aalaaba ay dulucdeedu ku saabsan tahay iska hor imaad arbaha (Hero) sheekada iyo koox kale oo ka dhan ah oo lagu magacaabo "Xumaanley" (Villains).

Waxay sheekada gaabani fiiro gaar ah siisaa arbaha sheekada, ficilladiisa, xiisihiisa, waxayna ku dhamaataa guulaysigiisa ama guuldaradiisa, kamana bixi karto sawirrada dhacdadaas iyo wixii la xiriira.Arbaha sheekada gaabani waxaa kale oo halkan kula jiri kara waxyaabo kale oo dahsoon sida dabeecadda, dareenkiisa, dareen kale iwm.

Qoraaga sheekada gaabani uma yeelo arbaha ama qalanjada sheekadiisa tilmaamo ama camallo murgin kara ama dheerayn kara dhismaha sheekada, ujeeddooyinka qoraaga sheekadu, dherer kastaba ha yeelatee, waa inuu akhristaha tuso, maqashiiyo oo dareensiiyo waayo-aragnimo nololeed oo sheekadu xambaarsan tahay; hase yeeshee waayo-aragnimada sheekada gaabani waxa ay gudbinaysaa way xaddidan tahay.

Haba ka xaddidnaato xagga jilayaasha iyo tilmaamahooda; dhacdooyinka, macnaha iyo deggaamadaba eh, sheekada gaabani waa qormo dhan oo midaysan oo leh bilow, dhex iyo dhammaad, gudbinaysana macne sugan.Xubin walba oo sheekada ka mid ihi waxay la haysataa xubnaha dhismo ee sheekada intooda kale.

Carl Garbo oo ahaa nin Maraykan ahi wuxuu sheekooyinka u kala qaybiyey shan jaad oo kala duwna, Sheeko Fal (of action), sheeko Jile, sheeko fagaare, sheeko fikrad, sheeko dareengujis. Sheeko walba oo kuwaas ka mid ahi, waxaa dulucdeedu xoogga saartaa xubinta sheeko oo la xiriirta iyadoo ayan xubnaha kalena ka marnayn ee ay dhamaystir u yihiin.Haddii si kale loo yiraahdo, sheekada gaabani isku si uma danayso xubnaheeda.Waxaa dhacda in mid xubnahaas ka mid ah, ka soo qaad jilaha, ay sheekadu himmad iyo fiiro gaara siiso, kuwa kalena ay dul mar guud ku samayso iyadoo aan ku dheeraan.Tixgelinta xubineed waxay ku timaadda iyadoo qoraalka lagu celceliyo xubintaas ama iyadoo lagu qeexo oraaho xusuus leh oo dareenka akhristaha jiita.

Qoraaga xariifka ahi, xubin kastaba ha tixgeliyee ama ha culaysiyee, wuxuu sheekadiisa u soo bandhigaa si akhristaha xiisihiisa kicisa, wuxuu kasbadaa oo hoggaan ku qabsadaa xiska ama dhugta iyo dareenka akhristaha. Wuxuu kiciyaa oo dhaqaajiyaa dareenka akhristaha isagoo u adeegsanaya hannaanka iyo dulucda qoraalkiisa.Si uu ujeeddadaas u gaaro waa inuu qoraagu sheekada ka haqabtiraa ammuuro iyo shakhsiyaad isku liddi ah ama iska soo horjeeda sida naxdin iyo madaddaalo, jacayl iyo naceyb, caro iyo farax, samaanley iyo xumaanley iwm. Qoraa walba tix raac, tabihiisa iyo farshaxannimadiisa qoraal ayey ku xirantahay dhadhanka iyo xiisada sheekadiisu.

La soco caddadka xiga …..

C. C. Warsame (Feegaar)

DHAQAN SAWIRAN

Boggan waxa aanu bil walba ku soo qaadanaa hal shey oo ah waxyaaba soomaalidu hiddo iyo dhaqan u leedahay, kaas oo aqoontiisa iyo faa'iidada uu u leeyahay soomaalida aanay dad badan ku baraarugsaneyn. waxaana sheygaa ka bixinnaa faallo kooban oo ku saabsan waxa uu yahay iyo sida loo adeegsado. Taasina Akadeemiyada ayaa u xilsaaran.

Sawirka hoose waxaa kaaga muuqda alaab dhaqan oo soomaalida deegaanadeeda kala duwan aad looga yaqaano, kaas oo gobollada soomaaliya oo dhan caan ka ah.

FANDHAAL

Fandhaalku waxa uu leeyahay magacyo badan iyadoo loo eegayo deegaanada kala duwan ee soomaalida, magacyadaa badan waxaa kamid ah FANDHAAL, GURE, MOOQO, QARSIN, DHURE, FAR, IWM. Fandhaalka waxaa lagu cunaa cuntada, subagana waxaa looga qaadaa caanaha marka la lulo. Fandhaalku waa shey tilmaan u ah hiddaha iyo dhaqanka facaweyn ee Soomaalida, wuxuuna ugu jiraa kaalinta qaaddada ama malqacadda. Marka dhinaca dhaqandhaqaalaha la eego fandhaalku waa waxyaabaha ay soomaalidu ku faanto, waayo weelasheeda oo dhan waxay ka qoran jirtay geedaha. Fandhaalka waxaa laga qoraa geedlab badan oo kala duwan, iyadoo ay deegaanadu ku kala duwan yihiin, waxaana ugu caansan geedaha caduurka, shillanka garaska, berdaha, lebiga iyo quraca, galoolka iwm.